



QORRAXDII DHACDAY
Shekooyin iyo qormooyin ka hadlaya arimaha bulshada
QORRAXDII DHACDAY 2017
Marka ay Qorraxdu dhacdo waxaa so gala habeen,hadii uu habeen soo galana waxaa loo baahdaa iftiin, Buuggani waxa uu iftiiminayaa waxyaabo badan oo qarsoon ama la ilaaway, sida iftiinku u iftiimiyo habeenka.
Qorraxdu waxay iftiimisaa arlada,indhahaaguna waxay jecelyihiin marakay qorraxdu joogto in ay wax badan arkaan,Buuggani waxa uu iftiimindoonaa nolosha qof walba oo akhriya waana dhiganayasha fara ku tiriska ah ee waxyaabo badan oo dhacay lagu mala awaalay, waxa uu xoogga saarayaa sheekooyin & qormooyin kuwaas oo inta badan ka hadla xaladaha manta iyo kuwii tegay .
QORRAXDII-DHACDAY :- waxa aan ku doortay magacan waxaa jira waxyaabo qaarsoon oo u baahan in bulshada loo so bandhigo, hadaba micnaha buuggani waa wacyigalin iyo ogaansho.
sadik.oktobar@gmail.com
QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"
QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"


QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"
QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"


QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"
QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"
QORRAXDII DHACDAY
Sadiiq Jaamac Muuse "Oktobar"

QORRAXDII DHACDAY

SHeekooyin iyo qormooyin ka hadlaya arimaha bulshada.



SADDIIQ JAAMAC MUUSE
"OKTOOBAR"

QORRAXDII DHACDAY 2018

بسم الله الرحمن الرحيم

TUSMADABUUGGA……

QORRAXDII DHACDAY 2018

Odhaahda Qoraha……4
Mahadnaq……5
Hibayn……..6
Afeef……7
Hordhac……8

QAYBTA 1AAD SHEEKOOYIN

1-Adoo caga qaba haddaad cabanayso curyaan waxa jira nolosha ku cadiban 13-17
2-Dayaxii ifiyay dulmanihii daciifka ahaa 18-22
3-Nuur iyo nuura 23-30
4-Madaxwaynihii yool-laawaha ahaa 31-35
5-Gacantii garab istaagtay halyaygii himilada lahaa . 36-39
6-Shakiga reerku waa adoo guriga qaatay 40-42
7-Walaaltinimadu waa nasiib saxiibtinimaduna waa doorasho 43-45
8-Xaqiiqda oo la iska indha tiraa waa dulmi 46-48
9-Faqiirkii fiirin jiray fasalka 49-52
10-Xaasidka xaalkiisu waa sida 53-56
11-Layaabka layaabkii waa adduunka 57- 59
12-Ubadku waa xariga qoyska 60-62
13-Qofku inuu xabsi ku jiro waxaa ka daran inuu xabsi maskaxeed ku jiro 63-65
14-Riwaayadii midnimo qaran 66-75

QAYBTA 2AAD QORMOOYI

15-Hooyo hooyo ha murugoon 79-82
16-Guushu waa wadajirka 83-85
17-Waxa inaga dhexeeya oon si wanaagsan u qaybsano qof waliba meshiisuu ku dhargi lahaa 86-88
18-Horumarka iyo aadamaha waxa ka dhaxeeya 89-91

QORRAXDII DHACDAY 2018

19-Dumarka oo wax la baraa waa jiilka danbe oo wax bartay 92-94
20-Duruufaha adagi waxa ay soo saaraan dad adag 95-97
21-Ha keenin noole aduunka hadaadan hayn wixii uu ku nolaan lahaa 98-100
22-Qabo intaad awoodo waxay buuxin meel banaan . . 101-102
23-Talo nin aadan ka filayn bay kaga so tafiiqdaa . 103-105
24-Sigaarku waa qaraxa sanbabada 106-110
25-Degaanka aynu wadda ilaalinowaa inaga dhaxeeya . 111-113
26-Macalinku waa sida shumaca 114-115
27-Nabada aduunka iyo USA 116-117
28-Fur xayn daabka fikirka 118-120
29-Khatarta wararka ama wargaysyada 121-122
30-Kaddaa ha tuurine 123-124
31-Xaqa beelaha ka maqan waa maxay? 125-127
32-Ha is adkeen dib u bax 128-129

ODHAAHDA QORAHA

sheekooyin iyo qormooyin aan ku matalay xaladaha dalka iyo dadkuba ku jiro, waxaan inta badan ku hamiyaa in aan fariin qaaliya u gudbiyo jiilka iga danbeeya.

Badanaa wax walba sarbeeb baa ku jirta waxa aan intii tamartayda ahayd idiin soo gudbiyay wax allaale iyo wixii qarsoonaa ama aan dadku ka war hayn, una fiirsan

Akhriste ha akhriyin buuggan ,haddii aanad waxa aad ka faa'ido ila wadaagi Karayn,kana soo war-celin karayn.

"Waxa aan qalinka u qaatay in aan fariin qaaliya u qoro jiilka iga danbeeya"

MAHADNAQ

QORRAXDII DHACDAY 2018

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaah,kasoo ii surtagaliyay inaan qoro buuggan .

Waxaan u mahadcelinayaa **Saciid Cabdiqaadir Saciid,mahamed xaamud mahamed** oo igala qayb qatay dhamaan sawiirada ku jira buugga sidaan ku heli lahaa.

Waxaan u mahadcelinaya tafatirayasha buuggan **Maxamed Cabdilaahi "bishaar"** iyo **Cabdirahamaan Axmed Jama ismaciil mire"**

Dhamaan saaxiibaday aan halkan kuso koobi karan waxaan leeyahay waa mahadsantihiin

Hibayn

QORRAXDII DHACDAY 2018

Buuggan waxaan u hibeeyay Hooyaday **SACIIDO AHMED CIISE** iyo Aabbahay **JAMA MUSE JAMA** oo la macana ah hooyo iyo aaba walba oo soomaali ah.

Waxaa kale oo aan u hibeeyay dhammaan ummada soomaliyeed meel walba ay joogto.

Waxaa iyana si gaara ugu hibeeyay dhallinyarada aanu isku jiilka nahay iyo jiilasha iga dabeeya.

Alla mahad leh

Facebook:Saddiiq oktoobar
Email:Sadik.Oktibar@gmail.com
0633980205/0907715015/0657715015

Afeef

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxa aan ka codsanayaa akhristaha buuggan ugu horayn in uu gabi ahaan akhriyo,waxa aan anigu masuul ka ahay waxa aan qoray adna waxa aad masuul ka tahay waxii aad ka fahantay ,waxa dhici karta in aad meel si khaldan u fahantid soomaliduna waxay tidhaahdaa **“Hal nin la toosani,nin la tuur leh”**

Magacyada buugga ku qoran waxaan ula jeeda tusaale,magacaga hadaad ku aragtid walaal ujeedadu magaca maha .
Waa mid dhab ah in wax bini-aadam qoray uu khalad yeelan karo, wax aan ula kacayna maaha

“Waxa aan qalinka u qaatay in aan fariin qaaliya u qoro jiilka iga danbeeya”

HORDHAC

QORRAXDII DHACDAY 2018

Marka ay Qorraxdu dhacdo waxaa so gala habeen,hadii uu habeen soo galana waxaa loo baahdaa iftiin, Buuggani waxa uu iftiiminayaa waxyaabo badan oo qarsoon ama la ilaaway, sida iftiinku u iftiimiyo habeenka.

Qorraxdu waxay iftiimisaa arlada,indhahaaguna waxay jecelyihiin marakay qorraxdu joogto in ay wax badan arkaan,Buuggani waxa uu iftiimindoonaa nolosha qof walba oo akhriya waana dhiganayasha fara ku tiriska ah ee waxyaabo badan oo dhacay lagu mala awaalay, waxa uu xoogga saarayaa sheekooyin & qormooyin kuwaas oo inta badan ka hadla xaladaha manta iyo kuwii tegay .

QORRAXDII-DHACDAY :- waxa aan ku doortay magacan waxaa jira waxyaabo qaarsoon oo u baahan in bulshada loo so bandhigo, hadaba micnaha buuggani waa wacyigalin iyo ogaansho.

QORRAXDII DHACDAY 2018

QAYBTA 1AAD

SHEEKOOYIN

“Dulqaad,cabsi,dulmi,cawimaad,garab istaag,guul,wada hadal iyo jacayl inta iyo in ka badan aanoo ku matalaya sheekooyin waxaad ka dheehan doontaa dhiganahan qaybtiisa 1aad in aduunkan yahay tijaabo ,guushuna danbayso,bal tariikhda dib u raac waxaad ogaanysa dhacdooyin la yaab leh ,kuwanina waa kuwo si joogta ah u dhaca wana talo iyo tusaale”

ADOO CAGA QABA HADDAAD CABANAYSO CURYAAN WAXAA JIRA NOLASHA KU CADIBAN.



Maxamed waa wiil ka dhashay reer danyar ah, kuwaas oo deganaa xaafad ka dhisneyd meel xeryo qoxoonti ah, waxa uu ahaa wiil hami leh kaas oo jeclaa in uu noqdo macallin soo saara gan(jiil) dhisan kuwaas oo uu ku faano noloshiisa, hadaba Maxamed waxa uu aadi jiray dugsiga isaga oo caafimaad qaba ,waxa uu lahaa wadeeyo(asxaab) badan, xiliyada qaar suuqa ayuu jeclaa inuu aado, kubadda aad buu u

ciyaari jiray, xaafaddana caan buu ka ahaa, waxa uu ahaa dhalinyarada kuwa ugu dheereeya marka laga hadlayo orodka, boodada & dabaasha, waxa uu ahaa wiil uu Ilaahay iskugu daray garaad iyo garasho-dheer oo aan xad lahayn, maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa qabsaday tuugo, waxay ku dhaheen tiro dooro waxa uu doortay "3" waxa u soo baxday (in uu cararo haddii la qabtana la dilo) cajiib!.

Maba oga in uu yahay diyaaraddii aduunka, halkii buu caga kaga baxsaday isagoo ordaya bay ka hadheen waxayna dhaheen "war ninku ma gaadhi baa".

Habeen kamida habeenada ayuu waxa uu soo aaday xaafadda goortu(amintu) waa fiid, nurku(wakhtigu) waa xagaa, markuu tagay xaafaddii lugaha ayaa xanuunay waana iska seexday, habeenkii oo dhan buu hurday, xilli ay ahayd saaladii arooryo ayuu is yidhi kac mise luguhuba waa bilaa dareen! muddo **2** saacadood ah ayuu hubinayay wuuna aamusnaa, markii danbe ayuu yidhi "hooyo hurdadii ka kici waayay oo lugahaa la i haystaa bal kaalay arag"

Hooyadii waaba naxaday!! fajac baa ku abuurmay waxay tidhi "hooyo bal isku day in aad kacdo" mise wiilka waa ka dhab, Cisbitaal

in loola ordo ayay noqotay, reerku waa dan-yar, xaaladduna waxa ay ahayd mid aad u adag.

Hooyadiina waa murugaysantahay, odayga aabbihiina kama war hayn arinta wiilka iyo in uu Cisbitaalka yaalo, markiiba waa uu yimi Cisbitaalkii, arinta iyo darnaanteedaba waa uu ka war helay.

Digtoorkii baa yidhi "Rajo malaha oo dalka waxba loogama qaban karo".

Talo waatii Rabbiye odaygii talaa ku cadaatay, hooyadiina warkeeda daa, Maxamed oo jiifa qolka bukaanka ayaa waxa uu ka codsaday dogtorkii gaadhi curyaan maadaama qoyskoodu sabool yahay aysan awoodin kharashkiisa, Maxamed waa loo keenay gaadhi curyaankii waxaana loo geeyay gurigii, dhalinyaradii xaafadda ay asxaabta ahaayeen ayaa soo booqday waayaha quruxdaa lehna isla soo qaateen. Waxay arkeen in uusan faraxsanayn oo murugo isugu biirtay waxay isku dayeen inay maaweeliyaan oo ilowsiiyaan waxii dhacay ax! Laakiin wax la ilaawi karo maaha.

Waxaa iska waramay Maxamed oo yidhi "waxaan ahaa arday, waxaan ahaa ciyaartooy, waxaan ahaa ordaa, waxaan ahaa.....waxaan ahaa…" kolkaas waxa maqlay hoodyadii oo tidhi 'waxaad ahayd waad noo sheegtaye

waxaad noqotayna noo sheeg' Iyadoo murugo ay ku dheehantahay ayuu ku tiraabay 'waxaan noqday curyaan, waxaan galay nolol murugo leh, nolol aanan u riyaaqsanayn waxaan aduunka ka daawadaa indhaha wax ficilna ma sameeyo' Maxamed waxa uu galay noloshaa uu inoo tilmaamay,muxuu damacsan yahay isagoo noloshaas adag kujira inuu sameeyo? Maxamed baa mar labaad u waramay hooyadii oo yidhi 'waxaan rabaa inaan noqdo macalin, waxaan rabaa inaan noqdo halyay ummadiisa u halgama, waxaan raba inaan noqdo, qof gaadhay himiladiisa'.

Waxa jira dad nolol fiican ku nool asii aan ku qanacsanayn, waxa jira dad nolosha ku dhibban hadana farxad iyo raynrayn u dheertahay, Maxamed nolol ahaan waa uu liitaa, reer ahaan wax maal aduun ah laguma oga, hadana curyaannimaa u dheer mana niyad jabsana.

Waxaa jira curyaan nolosha ku cadiban adoo caga qabana waad cabanaysaa,ka cibra qaado aduunyada kuna quusqaado qiimaheedu .

DULUCDA SHEEKADAN

"Waligaa dhib kasta oo kusoo marta u dulqaado, waligaa ha ilaawin hana hilmaamin himiladaadii hore iyo hiigsigaagii, way dhici kartaa in ay noloshu ku ciisho laakiin xasuuso mar walba dadka kaa sii liita"

DAYAXII IFIYAY DULMANIHII DACIIFKA AHAA



'Dulmigu dacar weeye'

Cali waxa uu ahaa nin Xamaale ah , waxa uu ahaa nin aamina, waxa lagu aamini jiray waxyaabaha muhiimka ah intaa waxaa u dheerayd waxa uu yaqaanay guryaha dadka ay kalyantiga(macaamiisha) yihiin, asxaab badan buu ku lahaa suuqa iyo goobta shaqada, inta badan dadku waa ay raadin jireen, haddii uu xanuustana dadka maalintaa u baahdaani waa ay booqan jireen waayo bulshada ayuu shaqo fiican u hayay, inta badan qof sida daacad u ah lagama heli jirin goobaha iyo golayaasha

xamaaliyiinta, waxa uu awooday in uu dhaho shaqada xamaalnimada waan iska dayn laakiin dadka uu u shaqayn jiray ayaa uu ku ixtraamayay sidaas darteed waa uu ku qanacsan yahay in uu ka shaqeeyo xamaalnimada . Maalmuhu waa ay is gurayaan habeen iyo dharaarba way is daba marayaaan isaguna shaqadiisa halkii ayuu ka waday.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa gabadh ka mida macaamiisiisa uu la noolyahay ayaa waxay ku tidhi alaabta ii qaad, Cali waa uu u qaaday xamaantii (alaabtii), dhabbada gurigii gabadha isag oo haya ayaa qawlaysato (shufto) xaafadeed jidka u galeen, waxay ka fara maroojiyeen wixii uu alaab siday, Ayaan darro se Cali kobtaa ayaa alaabtii lagaga xoogay, suuqii ayaa uu kusoo noqday isaga oo naxsan maadaama ay alaabta lahayd gabadh aan sifiican u aqoon inuu yahay ninkii aan so tilmaamay, waa u yimid waxa uuna ku yidhi “alaabtaadii waa la iga xoogay dhammaanteed walaal, isagoo il irdhaysan (murugaysan) ku eegaya" !!!!! Intay wajiga kabax kasiisay ayay tidhi ‘Adiga ayaan kaa rabaa alaabtaydii, ama ina keen maxkamadda waan kala baxaynaaye’ halkii baa labo askari ka kaxaysay Cali oo jeelka loo qaaday, fajac iyo layaab! Maxaa dhacay?

dhammaan dadkii ay saaxiibada ahayeen ee uu u shaqayn jiray way waayeen mid kasta markii loo sheego in la xoogay ayaa uu dhahaa ‘aad ayaan uga xumahay haddii an joogi lahaa waan caawin lahaa’ waa runtood laakiin ayaan darro imika xabsiga ayaa uu ku jiraa, maalintii kowaad ee maxkamadda lagu balansanaa ayaa la waayay gabadhii soo xidhay,iman sidaas darteed dib ayaa loo dhigay, dhammaan dadkii Cali yaqaanay wanaagiisa way soo wada galeen maxkamadda iyaga oo leh “Cali waa runtii oo waa laga xoogay alaabta” halkii baa maxkamaddii ku bilaabmatay iyadoo loo eexanayn midna, waxaa dhacday in laaluush la bixiyay oo la yidhi xidha ninka waa wax sooyaamo(yaabo)!!! cidi ma oga se, meeshu waa meel aan looga baran arimaha musuqmaaasuqa, Cali baa hadlay oo yiri ‘*Waxaan ahay xamaale, waligay xil baan qaadayay, ma arag cid igu safaadda ,waxaan mar walba ahaa nin dadka waxooda ilaaliya waxaana damaanad qaadi jiray alaabaha intooda ka badan, qaddar baa igu yimid waana la iga itaal roonaday alaabadiina waa ila iga xoogay, dhalinyaro iga badan col aanan u babac dhigi karayn ayaa i helay ileen* ***col kaa badan iyo biyo kaa badanba waa ku hafiyaane,*** *naftayda ayaan u baqay*

markhaatina waxaa ii ah dadka oo dhan' Gar-qaadihii waa qoslay ileen waa nin wax ku maqan yihiine waxa uuna yidhi 'tuug baad tahay dadka xoolohooda ma siin mise xukunkaan soo gaabiyaa' Cali baa hadalay oo yidhi 'mar haddii xukun yimid ana aan gartayda sheegtay adaan kaaga hadhay mana awoodo alaabta in aan gudo' ninka gar-yaqaanka ahí illeen waa nin la laaluushaye indhaha ayuu u cadeeyay wuuna is dhaafiyay ***"nin meeli u cadahay meeli kamodowe"*** xaalku meel xun ayuu gaadhay, gabadhiina waxay leedahay *"alaabtii isagaa xaday oo waa tuug'e shareecada ku xukunma"* cajiib!! Dadkii ayaa hal mar kacay oo yidhi *'waxaan marag ka nahay in uusan Cali tuug ahayn wax walba oo lagu xukumana anagaa u doodayna'*

Marka aad tahay qof wanaagsan dadkoo dhami ku jecelyihiin qiimo ayaad leedahay, gar-qaadihii ayaa yidhi *'Cali waa tuug waana nin indha adayg ku darsaday, waxaa lagu xukamay 1 sano oo xadhiga iyo alaabtii u xaday oo uu soo celiyo'* Dulmigu xumaa!.

Dadkii ay macaamiisha ahaayeen ayaa hal mar kacay oo yidhi *'Gar-qaade anagaa bixinayna alaabta lacagteediiye adiguna xariga ka dhaaf'*

QORRAXDII DHACDAY 2018

Halkii ayaa cali lagu soo daayay gabadhiina alaabteedii la siiyay, Calina lagu soo daayay.

DULUCDA SHEEKADAN

"Noqo qof wanaagsan dhammaan dadku way ku jeclaan, wanaaji shaqadaada oo daacad u noqo, runta sheeg oo Beenta iska jir, dulmiga iyo musuqmasuqa iska ilaali, Ilaahay xasuuso go'aankaaguna ha noqdo mid adag, dadka xoolohoodana u ilaali, noloshadada micne u samee oo reeb sooyaal wanaagsan oo lagaaga daydo"

NUUR IYO NUURA



Nuur waxa uu ku dhashay degmo ka mida dagmooyinka Soomaaliyeed hilaaddu markay ahayd **1981**, Nuur isaga oo caruura oo jira 10 sano, ayaa waxa la geeyay dugsi Quraan udhawaa gurigooda Quraankana ka baran jiray

Maalin maalmaha ka mida ayaa waxa la keenay dugsigii Quraanka gabadh la dhaho Nuura Waxay jirtay 9 sano, waa inan Eebbe ugu deeqay muunad iyo muuq iyo jaah wanaagsan, qof ilqabad iyo ilwaad lehna way ahayd, jalleecada iyo milicsigeeda oo keliya ayaa

dareen kugu beeraysay Waa inan qofkii bidhaanteeda arkaa uu aad iyo aad ula dhacaayo. Nuur maalintii inanta la keenayay waa uu maqnaa oo waa uu u jaray dugsiga, balse maalintii xigtey buu yimi, markuu illinka kasoo galay ayuu arkay inanta fasalka ku cusub, danse kama geline horuu iskaga ii galay fasalkiisii…Muddo bil ah buu arkayay uusanna la hadlin, maalin ayaa iyada oo lagu maqanyahay cuwaaftii ayaa waxa god Nuura u dhawaa waxa ka soo baxday Abeeso Nuura bahalku wax saasa uma jiro, Nuur oo qudha baa arkay bahalka, Nuur gabadha ma garanaayo balse bahalka ayuu aad uga naxsanyahay kadibna wuu qayliyay... oo waxa uu yidhi *'heblaay bahalka maadan arkayn ka carar!"* Nuuro intay moodday inuu la kaftamaayo bay xanaaqaday oo tidhi *"war bax"* Nuur weedhu uma muuqan balse bahalka oo xaggeeda kusoo siqaya ayaa u muuqda, intuu kacay ayuu Nuura hareer u tuuray bahalkiina dilay sidaasayna kaga badbaaday, Nuura markii ay aragtay inuu Nuur badbaadiyay ayay ka qoomamootay weedheedii hore oo ku tiri *"walaal raali noqo maan moodayn in ay run kaa tahay'e inaad ila kaftamaysaan u haystay,*

makula saaxiibi karaa ayay ku tiraabtay Nuuro' Nuur baa ugu hal-celiyay *"Haa walaal"*.

Halkaas ayay ka bilaabmatay hanaqaadkii Nuur iyo Nuura iyo waayahoodii, kala gadisnaa.

Gu'yaal badan oo ay wada joogaanba ayaa maalinkii dambe reerkii Nuuryo go'aansaday in ay oo soo hawo gaddistaan in muddo ah oo waxa ay u ambabexeen magaalo kale.

Nuur isagu ma walwalin waayo waa uu yaraa, Nuurana maba ogayn in uu tagayo waayo Nuur waxa uu ahaa wiil af-gaaban oo aan waxba cidna u sheegin, Nuur reerkoodii sidaas ayay ku tageen waxayna magaaladdii ka maqnaayeen mudo 12 sano ah, muddo dheer kadib Reerkii waa ay soo laabteen, goor gabbal gaab ah oo libdhaduna sii qandoodsatay ayaa Nuur oo maraya duleedka magaalada ayaa uu arkay gabadh aad u bilic-san waxaana maankiisa durba kusoo dhacay 'Nuura' mise waaba iyadii oo aad moodid *Qalanjo daaqaysa kayn dooggu maasheeyay oo hadda uu roob ka qaaday oo caleemaha biyo da'ayaan baliyadana wadhanyihiin*, Qurux badnida jaaheeda oo indhihii arkaa aysan ilbiriqsi moogaan karayn kuna indha doogsan karo qofkii koroshooyin (daqiiqado) noloshiisa sii daawada.

Fallaadhii caashaqu gamay ee Nuur iyo Nuura il bay ka bilowmatay balse isma yaqaannaan oo

ma oga inay yarantoodi wada jireen, Nuur ayaa waxa uu jeclaystay in ay is bartaan inantan maadaama uusan asxaab ku lahayn halkan.
Nuur*: walaal makula hadli karaa?*
Nuuro*: Haa walaal*
Nuur*: waayihii la joogaba labaa is baratoo dadka berya iska haybsatee kawaran haddaan is barano?*
Iyadoo indhaheeda laga dheehan karo kalgacal iyo furfurnaan asii uu xishood ku jiro ayay ugu warcelisay: walaal dhib uma arko.
Nuur: magacaa walaal?
Nuuro*: walaal Nuuro ayaa lay dhahaa, ee waa caadi aynu is barano e adna magaca?*
Nuur: walaal anna Nuur baa la dhahaaye barasho wacan.
Nuuro: wacan oo wanaagsan.

Sheeko aan saa u badanayn baa la is waydaarsaday oo midba midka kale bartay waana la kaftamay tirsiyadan (numbers) waa lakal qorta oo aad bay ugu faraxsanaayeen Nuuro iyo Nuur inay is bartaan.
Nuur baa waxa uu yiri*: Nuuro walaal wan ku gartaye adigu ma i garatay?*
Maya bay tidhi.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxa uu yiri*: waxaan ahay wiilkii aad isku dugsi Quraanka ahaydeen ee berigii abeesada ka Bad baadiyay.*

Nuuro aad bay u faraxaday kadibna waxay is dhafsadeen waxay ku ciyaari jireen yarantoodi oo ay ka sheekaysteen.

Nuuro waxay bilowday inay si walaaltinimo ah ula hadasho Nuur oo aan xiriir kale ka dhaxaynin balse calmashadiyo caashaqu waa waabaayo halisoon dawo lahayne ninkii Nuur ahaa baa jeclaaday Nuuro oo hootadii jacaylkaa tumaati ugu habsatay dacalka wadnihiisa.

Mudo 1 gu' ah bay u wada hadlayeen si walaaltinimo ah.

Maalin maalmaha ka mida ayaa Nuur waxa uu damcay in uu guursado Nuuro iyadoo aan wax jacayla labadooda uusan kulmin, balse Nuuro laftigeedu way jeceshahay Nuur waxaase meesha taal balantii ay galeen ee ahayd inaysan xiriir kale la samayn wiilka Nuur la dhaho.

Nuur habeen buu wadeeygiisii Warsame oo ahaa wiil ay loox wadaag ahaayeen ayna wada socdeen in doora inta u yimi ku yiri*: jaalkayow talaan kaa rabaa?*

Warsame inta indhihiisa saa u eegay buu ku yiri*: war maanta waxbaa kaa salag lehe maxaan kugu kaalmeeyaa oo kaala taliyaa?*

QORRAXDII DHACDAY 2018

Nuur oo baqdini ka yara muuqato inta rubbad (naf) is galiyay hadalkii u guud maray wadeeygii Warsame, wuxuuna yiri*: jaalkayow gabadh la dhaho Nuuro baan jeclahay, waxaana wada soconay intaas oo gu' yaraantayadiina caruur wada ciyaadha oo isku dugsiya baanu ahayn waana jeclahay oo way rubaddaydaa (naftaydaa) calmatay, marka wadeey uma sheegan karo jacaylka oo waan ka xishoonayaa.*

Warsame*: talo waxaan kugu siinayaa jecaylkaaga waxba haka qarin, waayo waxaad tahay naf wax jecel ee u sheego wixii ay ku dhahdana waan u joognaa.*

Nuur aad buu ugu farxay talada saaxiibkii habeenkii buu wacay Nuuro, laakiin awood uu ugu sheego malaha wax kale ayey ka sheekaysteen mudda isbuuca ah buu sidaa ula hadlayay oo marka uu wacayo niyada gashtaa caawa u sheeg, balse xishood iyo afgaabni baa ciishay Nuur.

Nuur maalin jimce ah buu wacay Nuuro oo yiri *'Nuurooy waxaad tahay gabadh wanaagsan waxaadna tahay qof Ilaahay qurux ku mannaystay marka waxan rabaa inaan kuu sheego waxaan mudo qarinayay* -aamus gaaban dabadeed ayuu inta naf is geliyay ku yiri *'Nuuro waan ku jeclahay oo waxaan raba inaan is*

guursano'

Laba qof oo aan war isu haynin dhibbadanaa, show Nuuraba iyadaa basteed ahaydoo karti ay ku sheegatay la'ayd markaasay sidii qof gudcur kasoo boxoo kadin iftiimaya soo istaagay inta soo hinqatay tiri *'Nuurow walaal anna waan ku jeclahay sidoo kale, laakiin hal mid hadda diyaar uma ihi'*

Nuur inta farax la goohiisii kasoo baxay buu weydiiyay '*maxaa weeye halkaasi walaal Nuuro'*

Nuura *'walaal waa arinta guurka'*

Nuur *'dhib malaha markaad diyaar noqoto baynu kawada hadlin'*

Nuur iyo Nuuro muda kadib waa is guursadeen oo wayna aqal galeen waxay wadaageen nolosha macaankeeda waxay maalin walba ku farxi jireen wakhtigu siduu ugu hiiliyay oo uu labadooda isugu dooray.

Nuur ayaa maalintii dambe socdaal ayuu galay, kamaysan walwalin oo Ilaahay bay tala saaratay.

Nuur gaadhigii baa la dhacay oo shil buu galay, gaadhigiina dhagax aadu wayna ayaa ku fadhiistay, Nuur naftii ba kalxamaha timi, markaasuu inta naf is geliyay telephon-kii Nuuro garaacay oo yiri *'Nuuro walaal aan is cafino*

taydii baa gashay oo mar dambe ma kulmi doonnee….!

Nuuro *'yaah !* Intaas markay tidhi baa miyir ugu danbaysay, Nuurna meeshii bay haddu ku haleeshay oo waa la oofsaday

Maydkii Nuur oo naxash ku jira ayaa la keenay gurigii ay marantidiisu daganayd, markii lasoo dejiyay bay inta isku duubtay tiri iyadoo ilmadu ka tifiq leedahay *'Nuur layga aasi maayo!*

Dadkii oo idil ayaa yaabay oo yidhi *'Nuuro ma waalatay? waa la oofsaday oo waa mayd?*

Diidmo iyo qancin badan dabadeed waxaa lagu alaakoodiyay(sasabay) in maydka la aaso iyana waa yeeshay, halkiibayna asayda ku saaratay.

Nuuro wax uur ah ma lahayn oo ay ku xasuusato Nuur balse waxay booqasho u aadi jirtay maalin kasta qabrigii Nuur oo ay wakhti ku soo qaadan jirtay, muddo dabadeed ayay u waalatay jacaylkiisii, sidii bayna nolosheedii ku dhammaysatay

DULUCDA SHEEKADA

"Jacaylku waa wax jira,noloshana ku dhisan ,aduunkan wax jacayl kawayn ba laguu keenay ilaali naftaada ,waayu qof waliba wax waa jeclaan karaa laakin qof waliba naftiisa isaga ka masuul ilaali wajibka ilahay ku saaray

MADAXWEYNIHII YOOL-LAAWAHA AHAA



Waa beri samaad laga soo gudbiyo gedihiise, waa qoys reer mii ah, degsiimooyinku carriga waa ku teel teel, dhawr jeesba meel ay degenyihiin, inta ood wadaagta ahiba dabka waa kala qaataan, badarkiyo biyahana waa kala amaahdaan, waa dhul baad iyo biyaba leh.

Beder waa inan uu dhalay Cali, waxay dagan yihiin meel dooxada docda u xigta oo barwaaqo Ilaahay ku manaysatay oo dooxada inteeda kale ka ilwaad rooneyd, goortu waa gu', dalkuna waa nabad, Qoyska cali waxay ka koobnaayeen

QORRAXDII DHACDAY 2018

Beder iyo Farduus iyo Faadumo oo hooyadood ahayd.

Maalin maalmaha ka mida ayuu Beder foofiyay adhigii reerkooda, waxa uu joogaa meel cidlo ah waa isaga iyo adhigii uu waday. Bader xilli ay barqo ahayd ayaa waxaa ku curtay mayay afarta beyni ka hillaacay, Markuu arkay inuu roob soo curtay ayaa talo ku cadaatay, tolow muxuu ku fakaray!

Intii uusan maankiisa la tashan, ayaa roobkii billawday oo waabakan soo hooray, Adhigii geedihiina ayuu hoos galay isna geed buu iska hoos fadhiistay

Intii uu geedka ku gabanaayey ee uu hoos fadhiyay ayaa Beder waxa ku soo dhacay weydiimo ah *'Dalkan yaa u Taliya? haddii loo taliyana maxa laga dheefaa?…." Kolkaas ayuu h*al mar isaga oon tii saddexaad is weydiinin lasoo booday *'tolow adiguba maad u talisid'* amakaag iyo ashqaraar badanaa!

Beder waxa uu guda galay sidii uu uga tagi lahaa miyiga una tagi lahaa tuulada, Beder talaa ku cadaatay oo reerku maba haysto inan aan isaga ahayne halkee u hayaansanyahay…

QORRAXDII DHACDAY 2018

Bader ayaa maalin kale waxa uu raacay adhigii, mar uu marayay meel cidla ah ayaa waxaa so weeraray hunufaa Waraabayaal ah cabbaar ayuu dagaalamay oo qoob iyo qaylo isku daray, balse hal waraabe muusan la dagaalamayne waxay ahaayeen raxan waraabayal ah sidaas darteed naftiisu u baqay, halkii bay warabayashii xayn adhiya ku laayeen hilbihiina laba ukala dhiteen

Beder marku arkay inay 20 cuneen ayuu intii kale la baxsaday oo uu gurigii geeyay Cali oo ah Bader aabbihii ayaa canaan kula dul dhacay, Eebbow kadin ii fur ayuu taagnaaye waakan Beder kalsho helay uu raadinayay inuu reerka ka dudo oo uu aado magaalka, isaga oo is xanaajinaya ayuu reerkii ka tagay oo uu aaday Magaalada waxa uuna horay u kaxaysatay dhawr neef oo uu is laha magaalada ka iibso.

Magaaladii buu tagay waxa uu arkay in magaaladu tahay meel dad badan kulmisay, isla markiiba waxa uu guda galay inuu magaalada la qabsado, shaqana waa uu raadsaday, waa helay se nasiib badanaa …!, halkii buu ka shaqaystay waxa uu is qoray ciidanka xooga dalka (C X D) markiiba tababar baa loo qaaday muddo badan dabadeed waxa uu toos u raacay ciidankii si uu

usoo qaato tababar dhamaystiran mudo 2 sano ah ayuu ku jiray, Tababarkii waxa uu ku noqday halyay garasho dheer leh, balse xiniinyoole xafiiltan kama dhamaadee Beder waxaa lagu xaman jiray, ninkii reerkooda ka duday oo ka doorbiday inuu qori qaato, dhimashana guudka u saarnaado. Waa adduun iyo gedihiise, isla markiiba waxaa loo magacaabay *Janaraal sare* kaas oo inta badan qaata lacag badan, halkii ayuu kasii ambaqaaday halgankiina waxa uu is baray dad fara badan, miyuu u jeedaa se raggaa waxaa u muuqda meel sare'e.

Waxa uu xidhiidh la yeeshay madaxwaynihii markaa talada dalka hayay, waxaad moodaa in lugta uu qaadaba garab uu ku helaayo, halkii ayuu ku biiray ragii dalka u talinayay, wuxuuna noqday xubin ay ku faanaan.

Waa arrin iyana lala yaabo! bal u fiirso xaaladdu siday tahay, wax walb waa isugu hagaageen Beder isaguna lama yaabana, waayo waxa uu ka fakaraaya hadaad qabato kursiga talada maxaad qaban…

Waxaa la soo garay ammintii doorashadii dalka loo ballan sanaa, Isagoo matalaya xisbigii uu ka tirsanaa ayuu isa soo sharaxay, xisbigiisa iyo xisbigii mucaardka ayaa fagaarayaasha ku loolamay, markuu dad weynaha iska

dhaadhicinayay waxa uu halhays ka dhigatay *"Badbaado qaran"* waana nin ciidana dadkii baa doortay oo kursigii buu salka la helay.

Beder talo waa iskugu timi waayo yoolkiisii ahaa inuu noqdo madaxwayne ayaa rumowday, balse waxay ahayd riyo kado ku rumowday oo ma uu garanaayo waxa madaxweyne yahay iyo waxa looga baahanyahay toona.

Madaxwaynenimada hadaf kama lahayn aan ahayn mar uun qabo, Mudo sanado ah markuu xilka hayay ayaa dalkii isku dhex yaacay oo uu noqday xarun musuqmaasuq , oo cadaaladu waxba ka ahayn, halkii buu isku casilay waana dhaqaajiyay waxuuna aaday reerkii oo miyi jooga si uu bal usoo nafiso, waxa uu fadhiyaa meel cidla ah waxana uu u sheekeynayaa wiil dhalinayaraa, wax uu kusoo gaabshay "waxaan ka tagay halkan oo cidla ah, hadana waan soo noqday iyadoo cidla ah"

DULUCDA SHEEKADA

"Ha ku fakarin waligaa wax aadan ka mira dhalin Karin ,hana ka tagin waalidkaa maalinta uu baahi kuu qabo, khaladkagana qiro u shaqee bulshada kan fogow inaad dhaawacdid quluubta ummadda aad la nooshahay"

GANACANTII GARAB ISTAAGTAY HALYAYGII HIMILADA LAHAA



Yuusuf waa wiil uu dhalay Cali, waxa uu ahaa wiil firfircoon, hooyadii waa ay jeclayd wayna dhiirrigalin jirtay, mar walba waxa ay ahayd baraha koowaad ee guriga u joogta, isaguna waa jeclaa hooyadii, waayo mar waliba wuu hoos fadhiisan jiray isagoon wax cudurdaara kaga kici jirin inta hooyadii u dhamaynayso hadalada qalbiga galaya ee wax tarka leh.

Cali oo ah Yuusuf aabbihii aad buu isna u jeclaa balse kansho (fursad/jaanis) badan oo ay ku wada sheekaystaan ma helaan maadaama aabihii ilaaliye ka yahay shirkad magaalada ku taala oo uu reer biilka uga cayriyo. Marka ay kansho isu helaan weedho qaali ah buu ku dhihi jiray waxaana kamid ahaa "waxaad tahay halayay, waxaad tahay hogaamiye, waan kugu faanaa aabbee, waad qaban kartaa wax waliba, ha niyad jabin, ha is dhigan, aduunku waa ayaamo ee ka fakar qimaha aakhiro, wax ma u shaqaysatay aakhiro, diyaar ma u tahay qabrig iwm".

Maalin kamida maalmaha ayaa hooyadii xanuusatay, waxay wax ka gaadheen wadnaha oo ad u xanuuni jiray markasta qiimaha hooyadii u lahayd buu xasuustaa, guriga kama baxo, qur'aan buu saari jiray, hooyadiina way u duraami (ducayn) jirtay, mar walba waxay dhahdaa illahaw janada nagu kulmi ani iyo Yuusuf,.hooyadii maalinba maalinta ka dambaysa xanuunku waa kusoo siyaadaa Allaahu akbar!!!.

Cali isaguna aad buu u murugaysanaa maadaama xaaskiisu ay xanuusanayso, maalinkasta iyaduu ka fakaraa suuqa isagoo fakarayuu mara, dadkii

bay is ilaaween, qosolkii baa ku yaraaday, habeen isagoo uso sida daawo xaaskiisa ayuu waxa uu isku dayay inuu ka gudbo wadada, balse isagoo maankiisu maqanyahay ayaa gaari jiiray…..jug!!!!
Halkii buu ku dhintay oo naftii kaga baxaday, Yuusuf baa ogaaday dhacadadan naxdin badaan!!!!! Waa uu qayliyay isagoo leh “Alla aabbe dhimay!!!! Alla caawa aabbaa dhintay!!!!
Duqdii oo basteed ahayd oo ay naf lacaari joogto ayaa warkii naxdinta lahaa u yim….nab!!!
Wadnihii baa aad u garaacmay muddo yar dabadeed naftii baa daysay.
Yuusuf murugo, tiiraanyo iyo naxdin baa ku idlaatay.

Yuusuf murugo badan baa soo food-saartay. Guriga adeerkii ayuu tagay oo lagu yiri ku nolow. Oraah buu qiima badan buu yiri: “hamigaan lahaa hooyadii i dhashay iyo aabbahaygii iga war hayay dhimashadoodii uga aan hari maayo”.
Yuusuf bal siduu wax u qabto aynu fiirino:

Ilaahay buu isku xiray, u duraamidda labadiisii waalid buu badiyay, wakhti walba digriga ILAAHAY buu waday, maalin baa waxa u yimi

adeerki oo ku yiri; inakeen suuqaynu aadaynaaye, isagoo uga dan lahaa inuu soo ilawsiiyo geeridi naxdinta badnayn ee ku timi Yusuf, halki bay is raaceen, waxay socdaanba meherad bay tageen waxay cunaaan bay codsadeen, sheekaba sheekay la gashay Yuusuf adeerki waxa uu ka balan qaaday inuu isaga noloshiisa kafaalo-qaado, oo uu wax barashada halkiisa kasii wado isago jeclaa inuu noqdo "Qoraa" agabkii uu ubaahnaa buu xaafada u keenay dhammaan, isaguna aad buu ula dhacay sida riyadiisu u rumawday isagoon is dhibin!!!! dadaal badan kadib waxa uu noqday qoraa qiima leh oo wax badan qora kaasoo ka dhabeeyay firkii uu horay u haystay ee ahaa inuu noqdo qoraa qiima leh.

DULUCDA SHEEKADAN

"Waa inaad ogaataa qof kii la imtixaamo oo u dulqaataa inay waxba ka xumaanayn,garab qabo caruurta aan isku qayska tihiin hadaad awoodo waxaa dhici karta in qayb wakhtigu ciilay ,garab istaag inta hamiga leh aduunku waa ayaamo lagu kala danbeeyo"

QORRAXDII DHACDAY 2018

SHAKIGA REERKU WAA ADOO GURIGA QAATAY



Xasan waa aabe leh xaas aad u qurux badan iyo hal wiil, mar-marka qaar waxa uu daawan jiray xaaskiisa sida ay u qurux badan tahay, waxay ahayd iyaduna qof qiima leh, dhanka magaalada dadku aad bay u fiirsan jireen gabadha, raggu ishuu lasii raaci jiray dumarkuna hadalay kadaba tuuri jireen, waxay ahayd qof ILAAHAY hadyad ahaan u siiyay qurux.

Haddaan in yar fiirino yaraanteedi ama intaan la guursan, waxa ay ahayd gabar dhallinta xaafadu u tartamaan jacaylkeeda iyo beer laxawsigeeda,

balse Xasan oo ay guursatay waxa ay ku dooratay akhlaaqda balse ma oga inuu yahay ninka aad u shaki badan, inta badan su'aaluu waydiiin jiray, wuxuu guriga gaar haye uga dhigay caruurta xaafada degan oo uu ku yiri: lacag baan idin siine iisoo sheega ciddii guriga gasha.

Inta badan waa uu ka fakari jiray, oo aad ayuu uga walwali jiray in qofta uu qabo laga shukaansado ama loo daba maro.

Maalin maalmaha kamida ayaa waxa uu is yir "bal maata u dhuumo oo guriga tag, kolay qof baa iskaga jira e", waa hadalada shakiga qofka leh "iskaga jira" gurigii buu yimi mise nin baa ka hadlaya ma hubsan ee isagoo xoog finiina buu galay gurigii oo yiri yaa guriga idan la'aan soo galay mise waa aabbaheed oo booqasha ku yimi, waxaad moodaa inuu shakigu ku batay ninka. Xaaskiisii baa ku tiri "KA SHAKIGA REERKU, WAA ADOO GURIGA QAATAY", intuu naxay ayuu yiri: "walaal waa runtaa

Ilaahay haku sharfo igana raali noqo", halkii baa lamaanihii ku hanaqaaday oo qiima ku yeeshay

DULUCDA SHEEKADAN

"Shakigu waaa ficil shaydaan,ha guursan hadaad hadhow ka shakinayso xaaskaga ,malin ba la waydiiyay nin walan xaaskaga ma ka shakin lahayd? waxa uu yiri "illahay ba og anigu waa qaba iyada iyo illahay ba xisaabtamaya"

Waxaan uga soo socdaa shakigu raga uma ficna iskana ilaali waa hadimadda qoyskaga"

QORRAXDII DHACDAY 2018

WALAALTINIMADU WAA NASIIB, SAAXIIBTINIMADUNA WAA DOORASHO



Cali waxa uu deganaa Wadanka Keenya, waxa uu ahaa aabbe dhalay 2 wiil, waxa uu ahaa ugaarsade, mararka qaar waxa uu jeclaa in wakhtigiisa badanki uu ku qaato daawashada dugaagga (xayawaanka) aan ugaarta ahayn.

Maalin maalmaha ka mida ayuu waxaa uu is yiri ugaarsi aad, wakhtigu waa barqo duurku waa

sanqar la'aan, qof waliba waxa uu ka baqayaa sida uu duurku u aamusanyahay, Cali waa socday isagooy cabsiyi ku dheehantahay, dhur/ayaan (nasiib) wanaagse cod buu maqlay, waxa uu aaday dhinici codka mise waa MAROODI dhaawacan oo xayawaanada wax ugaarsataayi ay lagdi waayeen balse miciyo la helay oo ay dhawaceen. Waxa uu guda galay in uu kaalmeeyo maroodiga, waxa uu soo qaaday Geed loo adeegsan jiray qalajinta nabarka. Wuu dhayay oo yolay dilaacyadii jirkiisa ka muuqday. Maalintaasna kaalmayntii iyo dhayiddii Maroodiga ayuu u ugaadhsi baajiyay.
Cali waxa uu soo aaday xaafada goortuna waa gabal gaab ay cadceedu baalka sii dhigatay, Maroodigiina waa daba joogaa.

Xaafadii bay so gaareen Maroodigi iyo Cali oo dul saaran, waxaa arkay wiilkii curadka ahaa oo magaciisu ahaa Jaamac halkii buu maroodigi reerka ku kala bartay.
Maalin ayaa waxaa is raacay Cali iyo wiilkiisa Jamaca iyagoo uu weheliyo maroodigii,

waxayna aadeen damaashaad iyo dalxiis, iyagoo maray meelo aad u qurux badan. Goor ay xigsin tahay ayhana dhex marayaan ayaa jabaqi u baxday, way istaageen oo jabaqdii baxday dhagaha lasii raaceen, Arbahay ku joogaanse garay in meesha libaaxi joogo.


Arbihii inta ciyay oo cagaha dhulka ku garaacay ayuu foodda saaray dhankii aarku ka gurxamayay, markay isu muuqdeen ayuu Arbihii bilaabay inuu libaaxa cayrsado, halkii bay saddexdoodii oo wada jiraayi ku lib heleen libaaxiina uga badbaadeen.

NOOLAYAASHA WAXAA JIRA QAAR AAN ABAAL DHICIN OO BINI-AADAMKA WAX DHEER.

DULUCDA SHEEKADAN

In aad dooratid saaxiib aad ku qanacsantahay kaaso bari markaad dhibantahay ku cawiya ama naftiisa ku hura oo mar walba xasuusan saaxiibtinimadiini

XAQIIQDA OO LA ISKA INDHA TIRAA WAA DULMI



Baribaa Dhurwaa iyo dhashiis ay daganaayeen meel kayna, aroortii dambe ayuu waxa uu aaday ugaadhsi si uu naftiisa iyo dhashiisaba u quudiyo, markii uu caruurti ka tagay, ayaa waxaa cidlo ka helay libaax ay xurgufi dhextiil oo gebi inta qabtay laayay.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Markuu kasoo noqday ugaarsigii oo ay maalinkaas golcas lug jabani ugacan gashay ayuu yimi hoygiisii, dhashii uu mesha uga tagay waxaa cardaadiqaha ka dhigay libaax ay degsinta ku xafiiltamayeen, markaasuu yiri: libaax la iskama celin karee maxaa xala?

Intuu sidiisii sii ruqaansaday buu tagay xero ay ku jireen tiro ariy, markaasuu yiri: ariyoow caruurtaydii idinkaa cunay. Arigii baxsad bay damceen mise xeradaa aad u wayn oo lagama bixi karo lagamana boodi karo, kadib waxay dhaheen "Dhurwaa dharbaxada aad nagu dhufatid dhaawaceeda maalin baad dareemi doontaa"

Halki buu ku laayay dhamaan intii xerada ku jirtay wixii uu ka qaadan karayna sii jiitay.

Dhurwaagi baa hadlay oo yiri: libaaxow dhaawaca aad iigaysatay baqdinta aan kaa qabo adiga cidkalaan ka aargoostay.

DULUCDA SHEEKADAN

"Ha iska indha tirin cid wax ku gaystay,hana dulmin cid aan awood u lahayn inay iska ka celiso,mar walba ka shaqee wanaaga,cafi cid wa;iba waayo waa sadaqo,u sheeg inuu ku dulmiyay,caruurta dulmiga ka ilaali iyaga dareemka ku xum"

FAQIIRKII FIIRIN JIRAY FASALKA



Haaruun waxa uu ku dhashay miiga, waxa uu ku barbaaray isla miiga, inta badan waxa uu wakhtigiisa galin jiray inuu xoolaha raaco, ma haysan wahel ama cid uu la ciyaaro, reerkiisu waxa ay hanti lahaayeen dhawr neefoo ariya oo loo dhiteeyo isaga iyo walaalkiisa yar. Waa reer iska saboola asii Eebbe iimaan ugu deeqay. Isagu waa wiil aad u garaad iyo garasho badan, badanaana waxa uu hooyadii waydiin jiray hooyo magaalo maxaa la dhahaa? Hooyadii inta

uu muusooto ayay si hawraarsami ku dheehantahay u oran jirtay: “hooyo waa meel halkaa fog ku taala... inta afarta beyni midkood farta ugu fiiqdo…, oo dad badani joogaan”Wuuba farxay, waayo cidba isma arkaan aan aabbihii iyo labo oday oo cidaha ah ahayn. Wuxuu tawaloo is tusiyo magaaladii loo tilmaamay iyo dadkeeda badan, yabaqa iyo bulaanka ka baxayana ay dhegihiisu malaysanayaan, dadka kala duwan iyo wax yaabaha naftiisu u bidhaaminayso ayuu ku kadsomay, wuxuu talo ku gaaray in marka waagu faydmo, oo geed iyo guntile la kala garto dhaqaajiyo.

Halkii buu jarmaadada arooryaad jidka cagta saaray isagoon wax jiidina lagu ogayn buraashad degta u surnayd oo uu dhuun qoys ahaan u watay

Wuxuu toobiya ku jog ahaadaba xilli hadhsookorka ku began ayuu yimi magaaladii loo tilmaamay ee uu xaloo dhan ku tawalayay.

Ashqaraar iyo indha daraandar badanaa!!!!

QORRAXDII DHACDAY 2018

Sara kala dheer, laamiyo salli la moodo, suuqyo camiran, agabka suran iyo dadkaa soconayee sida geel hurweyna isu dhex maraya baaba wiilkii ku noqotay wax lala amakaago.

Markii ugu horaysay ayuu arkay dugsi arday ku jirto, wuu yaabay oo is weydiiyay: dadkan maxaa isugu keenay halkan qol?!!

Ardadii oo idil baa soo egtay iyagoo la yaaban qofkaan aanan dugsiga dhigan ee kadin qotoma sida madaloodigii.

Barihii ardadaa gartay wiilka oo inta boos u baneeyay soo fariiso yiri.

Maalinkii halkaasuu ku qaatay isagoo la dhacsan waxan qolka lagu baranayo.

Markuu cida noqday ayuu uga waramay wixii uu magaalka kusoo arkay, dabadeed buu hooyadii ku yiri: “hooyo waabkii “fasalki” wax lagu baranayay baan rabaa inaad I geyso?

Hooyadii baa ugu hal-celisay “aabbe aan kala soo tashado.”

QORRAXDII DHACDAY 2018


Gorfayn badan dabadeed bay hooyadii ku tiri: Haaruunow hooyo waxba kaa hagran maayee hoo baa intaa naga ah, waxaan waxbarasho kugu gaynana ma haysano hooyo.

Aad buu uga naxay markuu maqlay inay lacag tahay waxa noloshiisa horumarka u diiday, isba waa ogyahayoo afariyo tobanka neefee reerku dhitaystaan inaysan ka go'in.

DULUCDA SHEEKADA

"Waa in bulshada inta aan awoodin waxyabaha asaasiga ah laga caawiyaa,macalinku waa in uu ardada iyo bulshada kala yaqaan cidii wax gaara haystaan"

XAASIDKA XAALKIISU WAA SIDAA!



Waxaa sadcaal tamashlaa u wada baxay Saleeban iyo Geelle waxayna aadeen meel tuulada ka durugsan. Waa laba nin oo ilaaqtan badan inay doodaanna jecel. Carriga ay u bexeenna waxaa gabran, bah-gaaddo, xamaarato miciyuhu fara la egyihiin oo dooggii la dhaafay ku gal dhacsatay, dafto iyo inta orod wax ku gumaadda.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxaywada socdaan waxay isku qabteen inan ay sheeko wadaag ahaayeen oo tuulada Geellese ay aad isugu fiicnaayeen inanta. Hinaasaa galay Saleebaan oo waaka yiri: “heblo anay I jeceshahay”.

Geelle inta qoslay buu yiri war cawaandi baad tahaye maxay kaa jeclaan, maba u qalantide.

Geelle weedha kaftan buu u yiri, balse ninkii Saleebaan ahaa uur kutaallo hore iyo nabara uu qarin dhayayay baa damqaday oo inta ciil isla hayn waayay ninkii wadeeygii ahaa cay iyo candhuufaba isugu daray. War Saleebaan see wax kaa noqdeen ma hadalkaygii baad ka xumaatay? Geelle waa warmooge oo in saaxiibkii laabtu hurayso war uma hayo!!!!!

Adeer nagu kala wad anaa ku tusin inay I jeceshahay iyo in kale inta yiri Saleebaan aayar dhabbihii ay hayeen ka leexdeen oo qardo jeexbilaabay.

Geelle: “war saaxiib ayga ha igu cidlayn aygee kaalay aan si weheshannee?”

Saleebaan oo sii dunuunucaya ayaa ugu war-celiyay: “tii aad lahayd anay I jeceshahay wahel hakuu noqoto”.

Duurku halistiisuu leeyahay oo keli laguma mari karo, haddii aad keli u bareertid waa in aad kafantaada gacanta ku sidatid xaanshidii dardaarankana jeebka. Noole wixii soo habaabana waa wax miciin hela iyo cid Alle u bixiyay iyo qaar miciyaha haanraawayaashu hooy u noqdeen.

Iyagoo sii yabqaya ayay bahal goola oo gaajo la goolmoon mus halkeera kasoo booday. Geelle wuxuu ku baraarugay goosha muska kasoo booday iyo dareen la’aantiisa, nafi orod bay kugu aamintaaye halkii buu baxso damcay….. Ninkii Saleebaan ahaa markuu arkay Geelle oo baxsada iyo gool daba ordaysa ayuu geed hareeriyoo u dhawaa hal haleel ku fuulay.

Haday taadu gasho orod waxba kuma taro, Geelle caguhuu miciin biday waa badbaadin waayeen oo isagoonba geedkii bilcilka ahaa la laaban ayay sida wax cirka kasoo dhacay dusha

uga booday oo margiga inta mici kaga hubsatay dhulka ku legeday, WAR SALEEBAANOW BAHALKA IGA FUJI, WAR BAHALKA IGA RID, WAR HEBLAAYO ADAY KU JECESHAHAYE IGA FUJI GOOSHA iyo erayo badan oo kale ayuu ku cataabay.

Saleebaan bahalka ninka haysta dan kamalehee xurguftii yarayd baa kala weyn.

Oo mahadaad qiraysaa in ay I jeceshahay, mise bahalkaa kaa yeersiiyay? Ayuu inta ku yiri u raaciyay haku bagah.

Gooshii waa ay jiidatay raqdii oola dhaqqaday, isna inta degtay tuuladii ku cararay say wax u dheceenna sheegay isagoo ilduufay inay gabar isku qabteen.

DULUCDA SHEEKADAN

"Xaasid xaalkiisu waa sidaa, hala safrin, hala saaxiibin, iskana jir xaasidka, waxa uu kaaga tagayaa meel aad baahi u qabtid"

LAYAABKA LAYAABKII WAA ADDUUNKA



Faadum waa 4 jir Faaraxna waa 80 jir waxa ay ku kulmeen meelaha lagu nasto, Faarax baa waayo waayo xasuustay iyo caruurnimadiisii markaasuu inantii yarayd la yaabay.

Mid waliba niyaduu ka faraxsanyahy oo ka taamayaa balse odaygu waa jeclaan lahaa in uu Faadumoo kale noqdo.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Faadumo ayaa tiri: awoowe intee noolayd?
Faarax waxa uu yiri: waxaan noolahay in aan yareen kolay in badan wax waan soo cunayay”
Faadumo: oo maxaa madaxa ku cadeeyay”
Faarax: da’ahaan waan waynahay waana intaan noolaa, hadaad sii noolaatid waad gaadhin halkaa.
Faaadumo: wajigaaga maxaa isku keenay ama duuduub?
Odaygu aad buu ugu faraxsanyahay in uu gabdhaas yar la sheekaysto.
Faarax: itaalkaygaa yaraaday in badanna qorax way i haysay.
Faadumo: hadaan anigu sii noolado ma saas baan noqonayaa?
Faarax: aniba waan soo maray wakhti aan sidaada u qurux badnaa.
Faadumo: ma isheeegi kartaa waxyaabo aad leedahay waan soo arakay ee aad igala talinaysid?
Faarax:addex weeleey awoowe waana waano wayeel;
1-waxa aduunka laguu keenay kasoo bax waajibkaa ku saaran.
2-cidna ha nicin hana karaahsan
3-farxadaada joogtay iyadaa dhiirrigalin kuugu filan.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Fadumo: intee magaalooyin ah baad soo aragtay.
Faarax: adeer wax badan waan maray, waayana iima laabna.
Faadumo: awoowe waan kula yaabanahy macquul inaysan ahayn baad moodaa.
Farxaan: maandhay ilaahay cimriga hakuu barakeeyee talloyinkaas iga qaado kuwanna ku darso
1-dadka caawi ama masaakiinta u roonow
2-asxaabtada wanaagooda u sheeg
3-hooyadaa iyo aabbaha ka ducayso
3- sumcadaada iyo sharaftaada kor u qaad
Faadumo: awoowe waayahay waan sii baxayaaye nabad galyo.
Farax: Ilaahow jiilka iga dambeeya qiimaha waxbarashada tus.

DULICDA SHEEKADAN

Hala yaabin aduuunkan waa marxalado kala duwan taaso qof waliba mar uu marayo soomaaliduna

QORRAXDII DHACDAY 2018

waxay tidhaahdaa 'Geel laba jir soo wada mar"

UBADKU WAA XARIGA QOYSKA



Sahro iyo Siciid wa lamaane ku midoobay nolasha macaankeeda, kuwaasoo inta badan wakhtiyo farxad leh wada qaatay, waxay dhaleen saddex caruura waana qoys dhammaystiran, Siciid waxa uu ka shaqayn jiray "Subermarket" wakhti badan buu ka shqayn jiray, mushaharka uu qaatana makafayn karo reerkiisa balse nolol caadi ah bay ku nool yihiin,

QORRAXDII DHACDAY 2018

Sahro iyadu ma shaqayn jirin laakiin caruurtay korin jirtay, aad bay isugu faraxsanaayeen balse khilaaf baa inta badan dhex oolli jiray, wax kale iskuma khilaafi jirine lacagta biilka ayaa ahayd midaan ku filan adeegga maalintiiya.

Sahro dulqaad iyo dayn bay wax walba oo keenaya inay caruurteedu noqdaan halyeeyo u sameen jirtay, balse Siciid waxa uu inta badan ku qaylin jiray xaaskiisa isagoo ugu hanjabi jiray “waan ku furaya hadaad buuqa iga dayn waydo”, Sahro way awooday inay tidhaahdo I fur balse mar walba caruurtaa isku haysay, khilaaf walba oo dhaca ubadku waa lama huraan, noloshoodu waa qaali, maalin maalmaha kamida ayaa wuxuu Siciid ku yiri “Sahro waad furan tahay”, intay isku qabteen waxyaalo aad u hooseeya, halkii bay Sahro gurigii hooyadeed qabatay ilmaheediina ay horay usii wadatay.

Siciid miyuu ka maarmaa caruurta illeen waa beer wax dhaloo yabaqoodii iyo reenkoodii buu u xiisay markuu ku kaliyaystay gurigii ay iftiinka u ahaan jireen iyo garoonkii ay sida caga

baruurka ku ciyaari jireen. Gidaaradii bay is eegeen, markuu cabbaar joogaba yabaqoodii buu ismoodsiiyaa. Maalin maalmaha kamida ayuu go'aansaday inuu dhashiisii ka war doono wuxuuna usii qaaday xoogaa alaaba iyo macmacaan, markay kulmeen oo ay sheekaysteen ayuu u dhaqaaqay dhankii hooyadii ubadkiisa dhashay, is waraysi gaaban dabadeed waxaa dhacday inuu Siciid yiri: **"Ubadku waa xariga qoyska",** halkii bay ka fahantay oo ugu hal-celisay: haduu ubadku yahay xariga qoyska, go'aankuna waa afkaaga" halkiii bay dib isugu noqdeen waxayna mar walba oo khilaaf yimaado ay xasuustaan ubadkooda oo aha xariga qoyska.

DULUCDA SHEEKADAN

"Waad xanaaqi karta, waana nici karta waxaad aragto,laakin markastaa oo khilaaf yimaado ka doorbid xanaaqa inay caruurtaadu noqdaan kuwo dayacan ,intaa aad dulqaadatid baa guusha dhabta ah gaaraysaa"

QORRAXDII DHACDAY 2018

QOFKU INUU XABSI KU JIRO WAXAA KA DARAN INUU XABSI MASKAXEED KU JIRO



Waxaa jiray nin aad wax u akhrin jiray maalin ayaa waxa ay is qabteen nin kale, ninkii akhriyaha ahaa waxaa uu watay baastoolad dagaal, kadib waxaa is gacan dhaaf ka dib halkii lagu dilay ninkii kale.
Askartii baa qabatay ninkii jeelkaana la geeyay, mudo dabadeed baa la maxkamadeeyay.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Ninkii inta fagaarihii la keenay baa waxaa la yiri: maxaad ninka ku dishay?

Waxa uu yiri: labo nin oo is dagaalay ujeedkuba waxa uu ahaa in labadayo mid un la ajalo, ninkaasina wakhtigiisi baa dhamaaday.

Xaakimkii baa yiri: waa nin xanuusan maadaama oo usagoo intaa buugaag akhrinayo. Waxay ku xukuntay 10 sanoo xariga, maxkamadii oo socota waxa uu yiri codsi baan wata?

Waatahaye soo daa ayuu xaakimkii ugu hal-celiyay.

1-inaad i dishaan oo aaan iska dhinto waayo waxaan dilay qof, sidaas aan dhimasho ku doortay.

2-in hadii mar la i xirayo kutub walba oo la qoro iyo kuwa aan dalbado la iisoo iibiyo.

3-in aan asbuuca 2 jeeer la kulmo qoraaga qalinkiisa aan ka helo.

Maxkamadi waa u ogalaatay in ay buugaagta uu rabo u keento maadaama uu yahay nin caado ay u tahay wax akhriska.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Halkii baa lagu xiray mudo 10 sano ah markuu jeelka ku jiray sidiina uu wax u akhrin jiray ayaa waayihii is gureen shalayba darraad ka dheeraysay.


Maalintii lasoo bixiyay ayuu yiri odhaah la layaaabay: qofku inuu xabsi ku jiro waxaa ka daran inuu xabsi maskaxeed ku jiro.

DULUCDA SHEEKADAN

Wax akhri oo quud ka dhigo akhriska noqo cilmi-baarre, waxa kowaad aad codsatid hanoqdo cadada oo ah akhriska.

QORRAXDII DHACDAY 2018

RIWAAYADDII "MIDNIMO QARAN"



- ***BARASHADA JILAYAASHA***

Mahamed " waxa uu kasoo jedaa dhalasho ahaan Soomaalida degta Jabuut i"
Caasho "waxay ka dhalatay deegaanka Soomaalida Etopia"
Faarax "waxa uu kasoo jeeda Soomalida degta Kenya"
Saciid 'waxa uu kasoo jeeda Soomalida degta waqooyi Soomaliya"
Axmed 'waxa uu kaso jeeda Soomalida degta konfur Soomaliya"

QORRAXDII DHACDAY 2018

- ***ODHAAHDA QORAAGA***

Qoraaga "soomaalaay sabool ba tihiin samaana diideene,sinaan iyo cadaalad midnimo waad ka saahideen,si kastoo la eegaba samahii waad ka soomantihiin,sadkeeni rag baa sahansadoo calanka saartay,saxaraha waxaa daadasan waa sabayideeni dheh,qabiil baa inakala soofshee,soomaalaay 30 sano dagaalkii socday oo sabiyada layay ,maanta baan isku dayay inaan idiin tilmaamo midnimdu meeshay ka dhawdahay"

- ***ODHAAHDII JILAYAASHA***

Mahamed "waxaa nahay dawlad ,waxa nahay walaalihiin wana idiin jecelnahay ,jeexayaga baa tihiin ,jiha kasto laga eego makala maarano"
Caasho "waxa nahay dawalad ,waxaa nahay walaalihiin ,waynu kala tagnay ,waxaanu hoostagna dawlad kale ,inaan is taakulaynana waan jecelnahay"
Faarax "waxaanu hoostagnaa dawlad ,waxaanu xuquuq ku leenahay dawlad,waan idin jecel nahay idiinkamana maarano"
Saciid "waxaa nahay dawlad ,waxaanu nahay gooni u istaag,midowna ima muuqdo aan

dawlad inaan noqdo ahayd laakin haddii xaquuq aan helno waan ogolahay wada hadal"
Axmed "dagaal iyo dhib waanu soo marnay dibna ugu noqon mayno wana jecelnahay inaani raadiyo ummadi aanu kala ba adiyownay"

- ***BILOWGA RIWAAYADA***

Axmed oo kasoo jeeday koonfur ayaa maalin malmaha ka mida fakaray isago ka fakaray meesha ay wax ka xumaadeen ,taariikhduu soo baaray muduu akhrinayay, bal meelaha waxa ka xumaadeen,markuu wax badan ogaaday ,ayuu safar u galay dalka Jabuuti isagoo casumaad ka helay saaxiibkii Mahamed,garoonkii diyaarada ayuu ku sugayay waa soo dhaweeyay gurigiisa ayuu geeyay lakin Ahmed waxaasi uma muuqdaan oo waxa uu radinayaa Jabuuti waxa halka dhigay iyagoo Soomaali ah,is waraysi kadib waa la balamay oo meherad suuq ah baa la tagay
Ahmed baa bilaabay "war Mahamed saaxiib dalkan soo maha Jabuuti"
Mahmed "haa saxiib waliba waa walaalihiin"
Axmed " Hagaag! Marka maxa anaga naga dhigay burbur idinkana idin ka dhigay dawlad'
Mahamed "anagu idinka oo dawlad ah banu dawlad ahayn"

QORRAXDII DHACDAY 2018

Axmed "hadba oo kalay dalkiina khayraad maku jiraa sidaa Shidaal,macdan ,gaaska iwm"
Mahamed "maya idinkaa naga qanisan laakin anagu dawlad baanu leenahay"
Ahmed " walaalow hadaba anaga idin ogol inaad nala qayb sataan nimcada marka saaxiib maad nagu soo biirtaan si aynu u noqono dad wada tashata oo wax ka dhexeeyaan"
Mahamed " saxiibow aduunku yeeli mayo anagu waa idin ogolnahay"
Axmed "bal wayahay aynu isku nimaano safar baan galaya "
Mahamed "halkee u socota"
Axmed "Etopia baan adaya oo waxaan la balanm sanahay Caasho"
Mahamed "Igu salaan walaal waa dad walaalahayaga ah oo anuu kala baadiyownay"
Ahmed "haye walaal safar salama inagoo midnimo ah baa inoo balana"
Mahamed "safar salama insha-allaah waan jecelnahay waxaad jeceshihiin"

QORRAXDII DHACDAY 2018

➢ *Ahmed wali waxa uu si wata safarki ogaanshaha mesha dhibtu ka jirto waxa uu yimi magalada **Jigjiga** waxana garoonka diyaarada kusoo dhaweeyay Caasho ,is marxabeen kadib waxay tiri*

Caasho *"Ahmed halkan waa dawlad degaanka Soomalida Etopia"*

Axmed *"waan ogahay laakin maynan Soomali ahayn meshani "*

Caasho *"haa walaal halkan waa Soamaaliya laakin waxa maamula dawlada Etopia"*

Ahmed *"waxaan u socday inaan kala hadlo noloshiina iyo sida aad markii aad Soomali ka baxdeen noqoteen'*

Caasho *"walaahay walaal Soomaali kaliya ma degna halkan waxa lagu beeray Etopian kuwaas oo nala dega ,way dhacaan xasuuqyo mar mar loo gaysto soomalida ,waxan a ku nool nahay nolol gumaysi oo nalooma ogala sida idinka la idinku ogolyhay inaad wixii idin ka dhiman heshaan"*

Ahmed *"Soomaali maanta way kala ququban tay walaal waxana waxaas odhan ka danbeeya*

marka hore nafteena marka xigana cadowgeena"

Caasho *"aad iyo aad walaal waa sida aad sheegtay"*

Axmed "ma haystaan wax khayraada oo aad ku faantaan"

Caasho *"maya walaal waxa ay dawladu qabata waa wax iska yar sida wadooyin iyo biyo laakin nolosha anaga laso baxna"*

Ahmed *"aniga waxaan jecelnahay inaad nal qaybsataan khayraadka ee maalinta aan yeelano dawlad khali ah kawaran ma nagu so biiraysaan "*

Caasho *"walaal anagu idin ma diidin dhulkaa idiin diiday ,laakin anaga hadaad no haysaan dhul waa idin imanaynaa,lakin dhulka hada waxa nala degan Etopian walaal "*

Ahmed *"waa safraya haday xaladu sidaa tahay walaal markaan xal soo helo baan kula so hadlayaa"*

Caasho *"halke walaal u safryasaa,insha allaah diyaar ban ku ahay inaan kula xiiriiro"*

Ahmed *"Kenya walaal waliba somaalida NfD waxaan casumaad ka helay walaalkay Faarax"*

Caasho *'safar salama walaal iguna salaam waa walalkay oo duruuftu nakala kaxaysay"*

Axemed *'haye walaal midnimo baa ino balana"*

QORRAXDII DHACDAY 2018

Caasho *"waxaad jeceshihiin waan idiin la jecelnahay"*

- *Axmed Safarkii ayuu si watay uu ku ogaanayay xaqiiqda Soomaalida kalagaysa*

Axmed *"waxaan soo gaaray garoonkii magalada Nairobi"*
Faarax *"soo dhawaw walaal, halkan anaa kugu sugayay"*
Axmed *"waan dhawahay walaal , waxaan raba inaynu tagno meherad shaah ,waxaan haysta waa sacado kooban inaan ku waraystana waan jeclahay"*
Faraax *"walaal waynu is waraysan ,meherdaa ina geey "*
Farta ayuu ku fiiqay meheradii :-
Axmed *"haa waan arka ee ina fadhiisi walaal"*
Faarax *"walaal waayahay maxaad inoo haysaa"*
Axmed "dalkan Soomaalida degta iga waran"
Faarax *"walaal waxaan horta nahay waa Soomaali marnaba walaaleheen ilaawi mayno,hadaan kuu kala qaado waxaanu nahay*

in yar oo la maamulo ,nolol iyo nabad waan haysanaa si guud marka loo eego,laakin cid naga naxda ama cid naga war haysaa ma jirto,waxan ku dhibanahay dalka Kenya ,haday suurta gal tahay wana iskaga soo bixi lahayn waayo ninka ama qoyska Soomalida agtooda gaajo loo guma dhinto"

Axmed *"waxaa wada nahay Soomaali waxaan u imi halkan inaan bal idin waraysto noloshiina inaad naga maranteen ,waxaa soomaray laba dal waxan ka wada simantihiin midnimada laakin wakhtiga moodaa inuu diiday"*

Faarax *"hadaanu aragno dawlad Soomaali ah oo quwad leh waxaa balana inaan soo biirno oo walaalaheen dhib iyo dheef la qaybsano"*

Axmed "insh-Allaah waan samaysan dawlad wana guulaysan ,waxaynuna gacanta kuso dhigayna dhammaan inta wakhtigu nakala geeyay"

Faarax "insha-allaah walaal hada miyaad safraysaa"

Axmed "haa walaal waxaan u duulaya magalada Hargeysa oo uu igu sugayo Saciid"

Faarax "safar salama walaal iguna salaan waa walalkeey oo wakhtigu nakala geeyay "

Axmed "safar salama walaal wana kugu salamaya waxana inoo balama midnimo"

QORRAXDII DHACDAY 2018

Faarx "waxaad nala jeceshihiin waan idiin la jecelnahay walaal"

- *Axmed Safarkii ayuu halkii kasii watay waxa uu kasoo degay magalada Hargeysa*

Axmed *"waxaan soo garay Hargeysa wana magaalo jawi fiican madama ay maanta wajiyadii kowaad aan arko ay noqdoon Soomaali faraxsan"*

Saciid *"soo dhawaw walaal halkani waa jamhuuriyada Somaliland –caasimada Hargeysa"*

Axmed *"Hagaag! Walaal waxaan ka imi konfur waxana soo maray dawlado badan waxaan safarkaygii ku bilabay Jabuuti waxan soo maray Etiopia,waxaan soo maray Kenya ,hada waxaan imi hargeysa ,waxaan u socday inaan ogaado xalada dalkayga kala gaysay iyo midnimo in ay suurta gal tahay ,waxana dhammaan kala so kulamay waji wanaagsan Soomaalinimo iyo inaynu wehel nahay waxaan intaa dheereed in mid walba duruufta iyo wakhtigu barta ku xidhay,mid waliba waa jecela midnimada Soomalinimada ,hadaba walaal adi waxaan*

kugu imi inaan kuso bandhigo xalada dalku marayo iyo kala daadsanaanta inuu cadaw inaka faa'idaystay oo labadeena midba mar soo riixo"

Saciid *"walaal maasha Allaah waxaad gashay safar dheer ,waxaadna u socotay wax rajo laga lahaa ,waxaadna soo ogaatya waxyaabo badan waana muhiim in la is waraysto"*

Axmed *"walaal waxaynu rabna hayaanka midnimadda inaad ila bilowdo"*

Saciid *"walaal soo dhawaw Illahay wadad khayr ha ina tuso anaga walalahay ba tihiin"*

Axmed *"walaal waan safrayaa waxaan u socdaa Muqdisho"*

Saciid *"walaal illahay anago nabada iyo hamigaga oo rumoobay ha iskeen tuso '*

Axmed *'safar salama "*

Saciid *'safar khayre"*

DULUCDA RIWAAYADA

"Dareenka shacabka oo la kiciyo,in laga bilaabo midnimada ummada Soomaaliyeed hadba meesha suurtagal ah,in taariikhdii dhacday aan caqabad la iskaga dhigin ee meel lagu qore oo la bilaabo nolol cusub oo sharaf iyo karaama leh,taaso ku imaan karta in shacabka inta isku dhaw laga bilaabo midnimada"

QORRAXDII DHACDAY 2018


QAYBTA 2AAD

QORMOOYIN

Wadajirka,horomarka,waxqaybsiga waxbarashadda,caruurta,talooyinka,dhawaca nafta,fikirka iyo nabada aduunka kuwaas iyo kuwa kale oo badan ujeedadu waxa weeye dhirigalin iyo xasuusin ku qotonta horomarka bini-adamka iyo raad caaydii hore ee saamayta kulahaa iyo kuwa soo socdo uusan garanayn, waa qormooyin wax ka badalaya waxana kuso bandhigaya.

QORRAXDII DHACDAY 2018

HOOYOY HOYOOY HA MURUGOON!



“ILMADA HOOYADA KA ILAALI DHULKA”

Hooya waliba oo aduunka ku nool hami bay leedahay iyo yool ay carruurta ay dhashay ka leedahay.

Hooyadu waxay korisaa carruurteeda, marka ay ilmaheeda la dardaarmayso waxay inta badan dhahdaa: “xumaha ka fogow, wanaaga samee, dadka mahaysataa iyo kuwa baahanba u kaalmee waxna tar, weheliye (rafiiq) wanaagsan raadso,

salaadaha 5ta wakhti wadarta (jaamacada) la tuko……. Iwm.

Hadana marka ay rabto inay cabbirto sida hooyadu ugu soo dhabar adaygtay noloshiisa waxay dhahdaa “dartaa ban halka u fadhiyaaa, asaagay adaa iga reebay, waxaan soo maray nolol ciriiriya sidaad u heli lahayd nolol fican……..iwm”

Hooyo waa mid aan xaqeeda la gudi Karin waxayna mudan tahay maamuus iyo milgo iyo ilaalin dheraada, islaam ahaan, diinteenn waad aragteen meesha laga gaarsiiyay hooyada, oo kadinku jannaduba waa gundaheeda.

قال الله تعالى:-

"ووصّينا الإنسان بوالديه حَملته أمه وَهْناً على وهن، وفِصاله في عامين أنْ اشكر لي ولوالديك إليّ المصير* وإن جاهداك على أن تشرك بي ما ليس لك به علم فلا تُطعهما وصاحِبْهما في الدنيا معروفاً واتبع سبيل من أناب إلي ثم إليّ مرجعكم فأنبئكم بما كنتم تعملون" **لقمان:14-15 .**

"ووصينا الإنسان بوالديه إحساناً حملته أمه كُرهاً ووضعته كُرها وحملُه وفـصاله ثلاثون شهراً". **الأحقاف:15**

Abwaano badan ba cabiray hooyadu meesha ay ka taagan tahay bulshada haddaan jalleecno **Abwaan Hadraawi** isagoo ku hal-qabsanaya hooyo la hadlaysa wiilkeeda

QORRAXDII DHACDAY 2018


Calooshu intay ku hoysey
Hiyigu ku baxnaaninaayey
Horraadka intaad jaqsiisay
Dhabtaydu intay ku haysey
Intaad huwanayd taftayda
Hobeeya hobey hobeyda

Intaan dusha kuugu heesay
Intaan hanad kuugu yeedhay
Hawraaraha kugu ammaanay
Intaan hubin kuu xambaaray
Dartaa u hoggaansanaaday
Hadhuubada aan ku siiyey
Habniin adigoo ku diidey
Intaan hambo kuu daboolay
Hammuun iyo gaajo qaatay
Adoo haqab-beel ku seexday
Intaan hurdo kuu illaaway
Ilaashay hareerahaaga.

Hooyo waa lama huraan, qof walibana hooyadii waa jecelyahay "waxaa jiray bari hore, wiil hooyadii ku af-celin jiray kaasoo inta badan ku dhihi jiray naa naga tag, ma aqaan af adayga iyo dhiiranaanta iyo ku digashada uu bartay inuu hooyadi wax kaga sheego meel uu kasoo

dheegtay, hooyo wanaagsanna, maalina kama qoomamayn inay dhashay,
hadana Eebbay u baryi jirtay ammin kasta iyo goor walba ilaa ugu dambeyntii uu wiilkii noqday wiil hooyadii baarri u ah”
Ha habaarin wiilkaaga ama ha dhibsan, u duraan (ducee) in Eebbe tubta toosan ku hanuuniyo.

GUUSHU WAA WADAJIRKA



Sida idiin muuqata sawirka ku xardhan ciwaanka Waxaa guushu tahay waa wadajirka.

Waxaan rabaa inaan qeexo bal waxa la dhoho wadajir ama se waxa uu yahay kala qoqobnaan.

Wadajir: waa in waxa aad haysaan aad si dhamaystiran u qabataan ama si hufan oo kalsooni ku jirto u samaysaan.

Kal qoqobnaani: waa in waxa aad haysaan aad kala barataan ama aad isku qabsataan oo ninba itaalkiisa uu qaato.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Tusaaale ahaan:

Hadii aad fiiriso sawirka qoraalku ku socdo 1- waxay isku qabsadeen wixii ka dhaxeeyay oo ay uga gudbi lahaayeen booraanta ay dhex kuududaan.

2-waxay isku qabsadeen sallaankii ay meesha uga bixi lahaayeen wayna ku doodeen, dabadeed gudoonshaa yimidoo u kala gar naqay.

3-kolkii mid walbaaa is yiri Allaa i lehe dhankayga aan ka boxo, ayay waxay ogaadeen in midkoona uusan gaarayn meesha loo socdo oo ah fiinta sare ee booraanta.

ma moodaa xaalka maanta dunida Islaamka ka jira inuu saas u dhiganyahay?.....waa adiyo sida maankaagu kuugu suureeyo.


Halkaa maxaa kaga cad?

In wadajirku yahay guusha dhabta ah ee aduunka lagu joogo, kala ququbnaantuna tahay guuldarrada dhabta ah ee aduunka.

Hadaba waxaa jira dad aan aqoon inay wax wadaagaan dadka, iyagoo mar marsiiyo uga dhigaya inay is qabanayaan, dadna way

jecelyihiin guusha dhabta ah iyagoo u maraya wadajirka.

WAXA INAGA DHAXEEYA OON SI WANAAGSAN U QAYBSANO, QOF WALIBA MESHIISUU KU DHARGI LAHAA



Bulshooyinka aduunku waxay xiriir la leeyihiin, waxa iyaga ka dhaxeeya cidda uu haysa “Dawlada” taaso uu qof waliba ku kalsoon yahay cadaalada ka jirta garsoorka, waxay aaminsanyihiin in nidaamku keenay cadaaladda, waxana tusaale kuugu filan in wax la qaybsan

karo iyadoo qof waliba cadaalad uu ku qanco helayo.

Hadaba waxaa jira dawlado badan oo aan caadiliin ka ahayn waxa ay bulshada u hayaan, taaso inta badan lagu eedayoo madaxa dawladda, balse anigu haddaan baadhay waxaan ogaaday inay wax badan jiraan.

Tusaale: Haya'da sharci dajintu waa mid u dhaxaysa Dowlada iyo shacabka waana meesha awoodda dalka dhinaca sharciga haysa, waxaana inta badan la dhaha "Sharcigu qof waliba waa ka sareeyaa"".

Meesha wax ka qudhmeen waad fahantay baan u gartay, hadaan eegno dhinaca kale, dalka Soomaaliya waa dawlad madax banaan taasoo leh hay'addo sharci dajin, haddaan maalin kasta waxa laga cabanayaa musqmaasuq dawladeed, bal inyar u fiirso *"Dal islaaama oo cadaaladu waajib tahay, ayaa dadkiisii ka cabanayaa cadaalad la'aan"*.
Aan isku dayno inaan qeexno waa maxay cadaaladi?
Waa In qof waliba wuxuu xaq u leeyahy helo.
Waa maxay cadaalad daro?


QORRAXDII DHACDAY 2018

Waa in waxaad xaq u lahayd aad waydo.
Hadaba wax u dhaxeeya ma jiraan? Maya!!!!
Balse waxaad moodaa in dalkeenna wax u dhaxeeya ay jiraan, taasoo ah in wixii dadka ka dhexeeya cidaan la aqoonini u qaybiyaan.

Kuligeen waxbaa inaga dhaxeeya, waxa inaga dhexeeyana cid inoo dhaxaysa baa inoo haysa, si aynu wexeenna ugu qaybsano si cadaalada oo qof waliba meeshiisa ku dhargo waa inaaynu sharciga ixtiraamnaa, cidda sharciga haysana iyadu ixtiraamtaa shacabka iyo waxa ay u hayso.

QORRAXDII DHACDAY 2018

HORUMARKA IYO AADAMAHA WAXA KA DHEXEEYA



Waa sadaro hufan iyo weedho aan bulshada ugu iftiimin doono waxa uu yahay horumarka bini-aadamka iyo waxa ka dhaxeeya.

Waa kuma bini Aadamku?
Waa noole Ilaahay dhulka ku beeray,taasoo ka soo bilaabmtay Nabi Aadam iyo Xaawo, waxaa loo keenay oo shaqada koowaadi tahay waa *"Caabudida Eebbe"* intaa waxaa soo raaca waxa rabigeen yiri "saacadna aduunka ka shaqaysta saacadna akhiro u shaqaysta"

Halkaas waxaa kaaga muuqda hada sifican u fiiri oo dhugo, in aduunka cibaado qura aan loo iman ee loogu tala galay labada in loo shaqaysto soomaaliduna waxay tidhaada "Masjidka imow, suuqana haku raagin".

Waa maxay horomarku?
Horumarku waa wax qof sameeyo ama ummadi samayso taasoo ah in wixii hore laga tago wax cusubna la keeno, hadaan in yar fiirinno: Horumarku ma wax qofku ku dhashaa mise waa wax uu la yimaado?
Aniga:- qaybna aduunkuu la yimaadaa, qaybna aduunkuu ku sameeya, waxaana daliil ugu dhigayaa qof walibaayi isagaa wata fakarka iyo sida uu wax u qabsanayo, laakiin marka uu aduunka la qabsado ayuu keenayaa wax kale oo aduunka looga baahanyahay oo horumara amase hal-abuura.

Maxaa ka dhexeeya bini Aadamka iyo horumarka?
Waxaad moodaa inaanan nololi dheef lahayn hadaanay jirin bini Aadam iyo horumar lagu tartamo.
Hadaba halkaa waxaa kaaga cad Aadamuhu inuu yahay mid noole ah laakiin fakarka iyo aragtida

ah inuu horumar sameeyo ayaa keenaya inuu kaga duwanaado xayawaanada kale.
Waxaa ka dhexeya in midba bidka kale uu garab u yahay oo la'aantii socon Karin,waana sabata Illahay usan u kala reebin

caruurtu waa mustaqbalka barito aynu ilaalino ,kuna noolayno nolol farxad leh"

DUMARKA OO WAX LA BARAA, WAAA JIILKA DANBE OO WAX BARTAY



Marka la is barbar dhigayo aqoon iyo aqoon la'aan, aqoontu aad ayay u qiima badantahay. Haddii la rabo in gan/fac (jiil) cusub lasoo saaro, kuwaa oo ka dhisaa aqoon iyo garaad, waa in marka hore la dhisaa dumarka ama gabdhaha, waxaana taa uga golleeyahay in haddii dumarka wax la baro, waxay iyana ogaanayaan qiimaha waxbarashada sidaas darteed waxaa soo baxaya hooyooyin wax yaqaan oo hadhow bulshada kusoo kordhiya gan aqoon iyo aragti huwan. Hooyo walba oo wax baratay hadday mid ama

laba aqoon leh soo saarto, waxay bulshada kusoo kordhinaysaa aqoonyahano iyo dad dadka halkii san mariya lehna hal-abuurro kala jaada.

Tusaale ahaan hadaan eegno dhammaan dadka dunida ku nooli ma noqon karaan wada aqoon yahano, balse mid waliba tarbiyada hooyada wuu soo maraa waliba marna ma ilaawo sidii hooyadii usoo korisay iyo wixiii ay fari jirtay toona. Halkaa maxaan ula jeeda? Si loo helo fac caafimaad qaba, kuwaas oo himilo leh, waa in wax la baro dumarka kadibna la helo dumar aqoon leh, markii intaa la helo kadib waxay soo saraya gan (jiil) hammi le.

Hadaan inyar dib u eegno taariikhdii soomaalida inta badan hooyadu waxay caruurteeda kula dadaali biyo, caano, hurdo…iwm markaas ay inta siiso wuxuu rabo heesana u qaadi jirtay. Sheekooyin bay uga sheekayn jirtay habeen oo dhan waa la maaweelin jiray, waana inta ay aqoon u lahayd, balse maysan mooganayn inuu ilmaheedu wax barasho u baahanyahay oo uu asaagii la tartamo.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Si aynu u helno qiimaha dadku leeyahay, waa in maraka hore la helo warshad qiima leh, taasoo wax soo saarkeeda iyo tayadeedaba lagu kalsoonaan karo.

QORRAXDII DHACDAY 2018

DURUUFAHA ADAGI WAXA AY SOO SAARAAN DAD ADAG!!!





Waa wadan ku yaalla bariga dhexe ee qaarada Aasiya. Falastiin, waxa ay xuduud la leedahay wadamada Masar, Urdun, Suuriya, Lubnaan iyo Israaiil.

Markii hore dhulka waxaa degenaan jiray Carab falastiiniyiin ah iyo Yahuud dadka Yuhuudda oo laga tira badnaa. Waxaa lagu hillaadiyaa dadka reer Falastiin in ay dhanyihiin ilaa 8 milyan oo qof iyo ka badanba..

Falastiin waa dhulkii nabiyda iyo rususha, waana qibladii islaamka ee ugu horaysay.

Falastiin waxa ilaa hadda kadhisan dhismayaal taariikh aad iyo aad udheer leh oo cadaynaya

taariikhda soojireenka ah ee Falastiin ay leedahay.

Falastiin waxa ay leedahay tagto (taariikh) soo jiitamaysay xiliyo aad iyo aad u fog, waa dhulkii ay ku noolaayeen shacabkii loo yaqaanay Kancaaniyiin. Magaca falastiin cidii bixisay waxa ay ahaayeen giriigii hore, markaas oo ay magaca falastiin u bixiyiin dhulka xeebaha ah ee wadanka falastiin.

Xiliyada qaar magaca falastiin waxaa loogu yeedhi jiray dhulka falastiin iyo wadanka Urdun oo wada socda.

Islaamka kaalin wayn ayay falastiin kuleedahay, waa dhulkii barakaysnaa ee ilaahay Qur'aankiisa ku sheegay, Ilaahay suurada (Isra) waxa uu kusheegay "in Misaajidka Al-Aqsa iyo hareerihiisuba ay barakaysanyihiin". Ilaahay markale kitaabkiisa kariimka ayuu ku sheegay "Dhulka Falastiin marka uu yidhi kor ahaaye"

Dhulkii intaasoo tilmaamood lahaa waxaa maanta haysta #Yuhuud, kuwaaso ku gumaada shacabkii barakaysnaa ee Falastiin.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxay tiri habar Yuhuuda:- "Markii aan gubnay masjiddul Aqsaa maseexan habeenkii oo dhan cabsi darteed, waxaan kacabsanayey in ay Carabi madax-madax usoo galaan Israaiil meel walba, balse markii ay soo baxday qoraxdu, waxaan ogaaday in aan awood uleenahay in aan samayno waxaan doono, waxaanu hortaaganahay umad hurudda"
Julda_ma'yir

Hadabada waxan kuso gabagabaynaya hadalkayga
""Maalin bay qorraxdu soo bixi Yuhuuda oo cagta hoosteeda ku jirta Insha Allah.
Alle waxaan uga baryaya Reer Falastiin inuu u gargaaro iyaga iyo dhammaan Muslimiinta kale ee ku dhiban daafaha Dunida""

HA KEENIN NOOLE ADUUNKA, HADAADAN HAYN WIXII U KU NOLAAN LAHAA.



Waxaan rabaa inaan tusmeeyo ilmaha haysta nolosha fiican iyo ilmaha aan haysan. Hooyo kasta iyo aabbe kasta oo raba inay is guursadaan waxay ku tala galaan in Eebbe ugu deeqo ilmo ay ku indha doogsadaan oo noloshooda farxad iyo sugnaansho kusoo kordhiya, balse duruufaha iyo danaha lagu guursanayaa waa kala duwanyahay. Dadka qaar

baa nolol fiican ku guursada iyo kuwo aysan noloshu u ogolaan.

Ilmaha ku dhasha nolosha fiican waxa uu ku noolaanaaya nolol farxada, waxa uu noqonayaa qof hami leh, waxa inta badan u seexanaya si xasilooni ah waxa uu isku dayayaa inuu wax cusub keeno.
Ilmaha aan ku dhalan nolol fiicani ma faraxsana, himilo mal eh, walow noloshooda ay ku kala duwanyihiin hab tawalka (fakarka) iyo sida uu nolosha u arko, wax himilo ah ma laha.

Nolol maalmeedka ayaa ku ciriiriya, waxa uu dawarsadaa dadka illeen wax ma haystee.

Ilamahaaga hakeenin adduunka hadaadan ugu yaraan haysan xoog aad ugu shaqayso, mida kale sababta Ilaahay baa qadaray in aad noqotid qoys saboola. Saboolnimada iyo inuu ilmahaagu tuugsado waa kala labo. Inaad sabool noqotid waxaad u haystaa kansho (fursad) aad uga baxdid saboolnimada.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Inaadan maanta waxba haysan waa iska caadi, balse inaadan maanta hayn berina aadan hayn waa milgo iyo maamuus xumo aad aduunka ku noolaatid, adaana baryada baday ilmahaaga.

Marka la eegayo maamuuska aabbo walba nolosha uu ku leeyahay waa in uu nolol fiican u abuuro ilmihiisa si uu ugu faano.

Waa inaad nolol wanaagsan ku korisaa irsaaqada Illaahay baa hayee, hadana markay kusoo gasho guurso oo dhal oo sifiicn u noolow walaaal.

QABO INTAAD AWOODO, WAXAY BUUXIN MEEL BANAAN



Bulshooyinka aduunka waxaa jirta dhaqan wanaagsan oo ah in qof waliba wax qabto, wax qabo, adna wax qabo, qof waliba wax ha qabto

Qof waliba oo bulshada kamida waxa uu helayaa lacag ee waxaa qabta haddii la dhaho, waa'guba uma baryeen, balse waa wax aad u adag marka la qabanayo wax bilaash ah balse waa caado

wanaagsan haddii aad barato wax badan lagu badalikaro.

Hadaba dadka soomaalida wali waxa aynan fahmin in wax lawada qabto, kadibna ayaa la gaarayaa meesha loo baahanyhay.

Tusaale ahaan: haddii dhammaan dhallinta soomaliyeed la dhaho, haddaad bilaa shaqo tahay usoo bax maanta iskaa wax u qabso baynu samayn si ay khibrad u noqoto oo dawladuna u adeegsato awooda dhallinta

Inaynu dhammanteen wax wada qabsano haba yaraatee waa wax qiima leh oo noqonaya dhaxal aan uga tagno ganka naga dambeeya.

QORRAXDII DHACDAY 2018

TALO NIN AADAN KA FILAYN BAY KAAGA SOO TIFIQDAA



DARDAARANKA IYO TALADU WAA KA BAR TIIRKA NOLOSHA EE SI WACAN HAKUU DHOCO WARKA LAGU LEEYAHAY.

Ma tihid Maraykan, mana tihid Afrikaan Ameerikaan ee waxaad tahay Aadan Maxamed Aadan Tarabbi. Waxa aan kuugu magacdaray aabbahay, si aad u ogaato culayska isir ee soo jireenka ah, waa inaad garataa halka aynu ka nimi si aad u ogaatid halka aynu joogno.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxa kale oo muhiim ah inaad fahanto taariikh ahaan iyo dhaqan ahaanba kala duwaanshaha dhaqan dhaqaale ee Maraykanka iyo dhulkeennii Soomaaliya, kuu sheegi maayo macno badanna kuu samaysan mayso reer keenna iyo reeraha ay is riixriixaan waxaanse kuu sheegayaa oo macneweyn kuugu fadhida taariikhda awoowyaashay, Tarabbi, Maxamuud Daallin, Dawiil, Jaamac Waal iyo Isxal, inaad ka qaadato suugaan iyo hidde raac fiican.

Waxay ahaayeen kuwo maganta bixiya oo deeqsi ku ah waxay hayaan, waxay ahaayeen kuwo aan istaagin meesha hoose, waxay ahaayeen kuwo xagga sare ka goosta oo aan hoos u degin.

Ma doonayo inaad noqoto qof halkan isaga nool oo lagu yidhaahdo waxaad tahay dhalad Maraykan, laakiin waxaan doonayaa inaad noqoto saameeyaha Maraykan ka iyo dunidaba. Ma ihi xagjir, mana ihi argagaxiso, laakiin waxaan ahay muslim muslim dhalay oo raba inuu noolaado oo aakhiradaydana u shaqaysto, duniduna ay badbaado ku wada noolaato.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Dhulka aynu ka soo jeedno la ma gumaysan?!!! haa awoowyaashay la ma gumaysan la mana addoonsan waxay ahaayeen xor qoorta kor u taaga qab iyo islaweynina sanka cirka u taaga xilli kasta. Waligay maan qaloon sababtuna waxa weeye raadkii iyo hankii awoowayaashay ayaa ahaa kuwo cid kasta shaaha la cabba. Ha ku xidhmin cid gaar ah hana collaysan cid gaar ah, laakiin fikirkaaga siyaasiga ah iyo ka shaqsiga ah ba adigu jeexo oo saamayntiisa adigu yeelo. Waxaan qoray taariikhda aabbahay iyo suugaantiisa si aan taariikh khaldan laguu siin, amase aanay kugu adkaan inaad hesho suugaantii awoowgaa.

Waxaan isleeyahay waad i garatay waxa aan kaala hadlayo, haddii aynu isu noolaanno waan kaa caawin nolosha wixii itaalkayga ah, haddii aan kaa horreeyana dhur(nasiib)wanaagsan aabbo.
W/Q maxamed adan turaabi
CIBAADAD EEBBE SUNTO FARA KU HAYNTEEDA.
QABKAAGU WALIGAA HA SAREEYO.

WAXAAN WAXBA KU YEELIN AWOOD BAY KUU YEELAAN.

SIGAARKU WAA QARAXA SANBABADA



15 Cudur Oo Halis Ah Oo Laga Qaado Cabista Sigaarka

Sigaarka waxaa laga sameeyaa caleenta geed dhererkiisu ama joogiisu yahay hal mitir.
Geedka tubaakada (tobacco tree) caleentiisu gebihaanteed waa sun. Laakiin iniinta geedkaasi aad bay halis u tahay, nafleyda way sumaysaa oo dishaa.
Dhawr dhibcood oo ah casiir laga sameeyay iniinta geedkaas waxay ku filan tahay inay disho oo qudha ka jarto qof ladan oo caafimaad qaba, sida lagu caddeeyay cilmi baaris la sameeyay.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Iyadoo sababtu tahay dareen Alle ku abuuray, shinbiruhu uma soo dhowaadaan geedka sigaarka laga sameeyo. Sidoo kalena, shinnidu uma soo dhowaato kumana dul degto ubaxiisana dheecaan kama nuugto. Sidoo kale, bahaa'im kuna ma cunaan caleenta geedkaas.

Haddaba waxaa la yaab leh qofka sigaaryacabka ah oo Allehii abuuray siiyay caqli uu wax ku kala garto inuu hawadiisa raacay oo addoon ugu noqday qiiq.
Bal qiiq muxuu faa'iido leeyahay? Waxaynu ognahay inuu qiiqu dadka hawada oksi jiinka ka xiro oo cabburiyo kaddibna ay dhintaan.
Waxaa xoolaha bahaa'imka ah iyo shibiruhu iyo shinnidu ka fogaadaan ayuu banii Aadanku naftiisa ku haligayaa. Banii Aadanku ma dowdar baa?
Tirakoob la qaaday waxaa lagu ogaaday in dadka u dhinta sababo la xiriira sigaarka ay ka badan yihiin dadka u dhinta cudurada ka dhasha maandooriyaasha (drugs), ayddiska (AIDS), khamrada iyo shilalka gawaarida .

Waxaa kalee la soo ogaaday ragga sigaaryacabka ahi inay xagga raganimada

hawlgab ka noqdaan oo marba marka ka danbeeya awooddu ka sii yaraato oo hadduu xaas lahaana hawshii laga rabay ka soo bixi kari waayo maxaa yeelay waxaa ka fadhiistay matoorkii (machine failure).

Dhibaatada sigaarku keeno waaga danbe

Jirka (maqaarka:

Sigaar cabbiddu waxay kordhisa engaga iyo (qallalka) jirka ama maqaarka (skin dryness). Waxaa intaas sii-dheer, qofka sigaarka cabba jirkiisu wuu isku duub-duubmaa ama wuu isku canyaan-yuubmaa sidii maro aan la kaawiyadayn. Intaas waxaad ku dartaa, sigaar cabbiddu waxay daciifisaa ama sii yaraysaa siduu jirku wax isaga difaaci lahaa hadduu maqaarka qofka ku dhaco cudurka kaansarku.

Timo Daadasho (loss of hair)

Daraasad ama cilmi baaris uu sameeyay Machadka Daawaynta ee ku yaal dalka Ingiriiska (British Medical Institute) waxay caddaysay in dadka sigaarka cabbaa ay ka timo daadasho badan yihiin dadka aan sigaarka

cabbin. Sidoo kale, sigaar cabbiddu waxay soo dedejisaa timaha oo cirrooba oo dambas noqda.

Cudurada Sigaar Cabbiddu Keento waxaa ka mid ah:

– Maskaxda oo xinjiraysata
– Kaansarka ku dhaca cunaha ama booca
– Kaansarka ku dhaca sanbabada
– Kaansarka ku dhaca beer-yarada
– Kaansarka ku dhaca kaadi-haysta
– Sanbabada oo barara
– Lafaha oo bululа ama jileec noqda oo jabi og
– Habowlaha dhiigga qaada oo xirma
– Laab xanuun aad u daran (angina pectoris)
– Kaansarka caloosha ku dhaca (stomach cancer)
– Boog caloolo ama boogta gaastarikada (gastric ulcer)
– Kaaansarka ku dhaca ilma galeenka (riximka ama makaanka)
– Ilmaha uurjiifka ah oo daciif noqda
– Awood darada iyo hawlgabnimada ku dhacda raganimada ragga
Cuduradaas kor ku xusan haddii mid ka mid ah uu ku dhaco qof sigaaryacab ah, dhibaatadu ku ekaan mayso qofkaas dhibaatadu ku dhacay. oo keliya. Bal wuxuu qofkaasii mushkilad iyo

culays iyo culaab ku noqonayaa qoyskiisa oo ah dadka guriga kula nool, qaraabadiisa, asxaabtiisa iyo bulshada.
Cudurka kaansarku waa cudur halis ah oo dilaa ah. Qofkii cudurkaasii ku dhaco wuxuu noqonayaa fadhiid (curyaan)oo kale oo aan wax awood lahayn waxna qabsan karin..
Markaa qofka sigaarka cabbaa isna waa dhiban yahay, dadka kalena wuxuu ku hayaa dhibaato. Qiiqa qurmoon ee ka soo baxa sigaarka wuxuu ka soo uraa qofka sigaaryacabka ah iyo dharkiisaba, Urtaasina dadka way dhibtaa.

Qofka sigaarka cabbaa waa qof hawada naftiisu qool gashatay oo addoon ka dhigatay. Qofka Muslimka ahi wuxuu addoon u noqon karaa Allehii abuuray oo keliya.

Qofka sigaarka cabbow adba waad ogtahay siduu kuu bahdalay oo u beddalay midabkaagii iyo muuqaalka guud. Jooji cabidda sigaarka intay goori goor tahay oo is daba qabo, nbaad leedahaye…!!
Xigasho

QORRAXDII DHACDAY 2018

DEGAANKA AYNU WADDA ILAALINO WAA INAGA DHEXEEYA.



Waxyaabaha ugu muhiimsan ee saameynta ku leh nolosha Aadanaha waxaa ka mid ah sida uu u egyahay deegaanka uu Aadanuhu ku nool yahay ee uu noloshiisu ay ku tiirsan tahay.

Dhibaatooyinka deegaanka ee dalka mid aad u tiro badan oo saameyn adag ku yeelatay nolosha bini Aadamka iyo duurjoortaba.

Caqabadaha iyo dhibaatooyinka deegaanka ku dhaca waxa ay mar noqotaa mid dadka ay ka dhigaan deegaankooda mid aan lahayn manaafacaad dhanka wax soo saarka ah marna

waxaa jira dhibaatooyin dabiici ah oo dalka ka dhaca sida abaaraha soo laa laabta ,biya yarida iyo xaalufka dhirta.

Waxaa jira dad badan oo ay dhib ku hayn in la gubo ama la gooyo dhir ,waxa iyana jirta in dad badan ay isku dayayaan inay wax beeraan ,hadaba farqi intee leg baa u dhexeeya dadka nooca ah ,degaanku waa bilicda dhulka ,waana indhaha wadanka ,hadaynu dhammaanteen gooyno dhirta barina inaga go'ayna oo halka waxaan ula jeeda in anagu dhammaanayno oo wixi lagu nolaaln lahana la jari doono iyadoo la raadinayo nolol .

Qof waloo oo kamida bulshada waxaa ku dhirigalinaya inuu geed beero ,si loo helo dhul deegaan ahaan nabad qaba,quruxda badan ,degaanka oo la ilaaliyaa waa guusha indhaha iyo bulshada

"si loo fidiyo beeraha iyo wax soosaarka dalka waxaynu xoogga saaraynaa sidii aan wacyigalin ku filan ula wadaagi lahayn beeralayda iyo ardayda baranaysa kuliyadda beeraha taasi oo ka caawinaysa inay dalka wax ku soo kordhiyaan"

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxa jira sheeko dhex martay GEED IYO GABAR waxay isku arkeen meel aan qof joogin geed baa sheekada bilaabay .

GEED “waxaan ku iri ragu maxay noo gooyaan oo gabdhuhu noo goyn waayeen”

GABDHII “waxaan idiin goyn waynay horta idinku waa adagtihiin waxii adagna ragaa gooya ,mida kale waxan wadana maryo badan idinku waxaa idin ka farcama waxaan oo laan marka shaqa raga leh”


GEED “ maxaa noo gubi waydeen hadhowba anagoo gubaay baa na isticmashaan”

GABADH “waxaa la idinku guba dab dabkuna maha kan anagu aan isticmaalno ee waa mid duul duula oo la rabo in la idinku gubo”

GEED “waxana baabi’yay waa raga”

FARIIN GEEDKA AH “ragow waxaa tihiin muriqii reerka waxaa tihiin maamulkii reerka ,u horseeda ciyaalkina inaad ka dhadhicisaan in ay mamnuuc tahay inaan goysaan dhirta waayo waa quruxda ,faa’idada degaanka”

MACALINKA WAA SIDA SHUMACA.



waxa aad ogataa qofka aad hanan kartidid ayaad saamayna kaga tagi kartid. Wax kale oo aad ogaataa in diinteena islaamka ee aadka u qiimaha badan ay nagu boorinayso in aan dadka hanano oo raad wanaagsan kaga tagno. Waxa aad ku dayanaysaa nabigeenii Mahamed(SCW) waayo waxa uu ku guulaystay in uu hanto quluubta dadkii la noolaa, is la markaasna waxa u suurta gashay in uu raad kaga tago oo ay koox-koox u soo galaan diinta islaamka. Waxa aad

ogaataa in furaha aad ku gali karto qofka qalbigiisa uu yahay (kelmada waanaagsan)

macalinku waa kan ardayda bara wanaaga qalbiyadooduna ay bar walba kuso dhaco markii uu maqlo macalin ,macalin waa kan mar walba ardayda ku dhirigaliya inay guulaystaan ,waxa jira macalin ku faa'idaynaya sidaa shamaca uu uu u dhamaado oo inuu jecel yahay inaan wada hesho dhammaan waxa uu jecel yahay

macalinimadu waa shaqa lagu soo saarayo bulsho tayo leh kuwaaso iskugu jirta Hogamiyaha mustaqabalka,dhakhtarka mustaqbalk,iwm.

Mustaqabalka oo wanaagsan kuwaas oo ah muhiimada wax loo baray inay mustaqbalka anfacaan naftood iyo bulshada

Waxaan kula jecelahay inaad hanato ardeydaad wax barayso sababtuna waxa weeye:-
1:- inaad badasho akhlaaqda xun oo aad u badasho mid wanaagsan

2:- sadaqa jaariya ayay kuu noqonayaan waayo wanaag kasta oo ay sameeyaan ajar ayaad ku leedahay

3:- inaad noqoto sida roobka oo kale waayo roobku meesha uu ku do'o waa lagu doogsadaa adna noqo mid lagu doogsado

NABADA ADUUNKA IYO USA



Aduunkan waxa jira dawlado dhaha waxaan horseed u nahay nabada aduunka iyagoo gabaad ka dhigta inay saxiibo badan leeyihiin

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxa ugu horeeya dawlada USA oo aan kusoo qaatay ciwanka oo ah NABADA ADUUKA IYO USA.

Hadaad u fiirsato sawirka waxaa dhahaysa nabada marakan waxa uu ku yahay lid oo la micna ah ma ogola nabad USA ,waxa jirta siyaasad aan horay aduunka loo arag uu USA ku rabo maamulka aduunka,waxa jira inuu USA rabto inuu isku diro dhammaan cid waliba oo aan fakarkiisa kasoo horjeeda isagoo u adeegsanaya cid u dhaw.

USA waxay hormuud u tahay dawlada quwada aduunka sheegta,hadab waxaa is waydiin mudan dawlad nooca ah hadana siday ugu tahay hormuud nabada aduunka.

Waxa USA gaystaa falal lid ku ah nabada aduunka hadaba waxa halkaa ka cad in ay USA uu san ahay nabada aduunka.

Si kale aan u dhigo USA waxay sameesay cid ay awoodeda u adeegsato taaso ah inay cidii ka so horjeesata ay tahay ARGAGIXISO ,haday wareerarto cid la yabaysa ma jirto waayo waa laga soo horjeestay argagixisada dhabta ah USA suuq madow ee xasuuqa buu u noqday in cidii uu u geeesto awoodiis uu dhaho waa argagixiso.

FUR XAYN DAABKA FIKIRKA



Markaan ku leeyahay fur xayn daabka fikirka waxa ula jeeda u fikir si xor oo kalsooni ku jirto waxana jira duruufo kugu hareeraysan ka dhex bax dhammaan duruuftaa.

Fikirka wanaagsan waa ka shaqaysiinta caqliga (maanka) iyadoo ula jeedaddu tahay curin wax cusub ,curintaasi waa inay horseeda ,horomar shakhsi ,bulsho ama degaanba.

Horomar walba oo aduunka la gaarana waxay ka bilaabata fikir tolmoon oo si toosa looga fakaray. Haddii la waayo fikrad ama fikir waxa ka baxaya meesha hormarkii uu laha degaan bulsho ama shakhsi.


QORRAXDII DHACDAY 2018

Bini aadamku waxa uu ukala baxa 3 qaybood
Kuwa firkoodu sareeyo
Kuwa fikirkoodu dhexdhexaad yahay
Kuwa fikirkoodu hoseeyo
Hadaan isku dayo inaan qeexo mid waliba
Kuwa firkoodu sareeyo:waa kuwo had iyo jeer ka fakara curin wax cusub ku mashquula inay wax cusub aduunkan keenaan ,waa ku si kalsooni ku jirto u fakara.
Kuwa fikirkoodu dhexdhexaad yahay: way fakaran lakin wax ay ka fakaraan horomarka kufakarkoodu sareeyo ay gaaran bay ka sheekeyaan oo ay ku mashquulay.
Kuwa fikirkoodu hoseeyo:waxay inta badan ka shekeeyan waxyabaha "lalxaha ah sida gaadhi ,guri"
Hadaba maxa looga bahanyhaay qof walba oo raba inuu xayndaabka kabaxo .
1-qof inuu leeyahay danayn ama inuu fikir cusub raadiyo
2-qodku waa inuu xor yahay isku kalsoon yahay fikirkiisa ay xiray urur,xisbi iwm
3-qofku waa inuu wax diidi kara oo micnaha ah wax uu mankiisu ku farkro waa inuu diidi kara haduu xun yahy.
"Maalin anoo dhagaysana idaacad ayaan waxaan maqlay nin cimi baara ah ayaa soomaliya

booqday meel reer guura joogan,waxa uu la kulamay 40 jir reer guura ah waxa uu waydiiyay adeer awoowaha muxuu aha waxa uu yiri reer guura hadana waxa uu waydiiyay abahaana waxa uu yiri reer guura hadana waxa uu waydiiday adiguna waxa uu yiri reer guura"halaka waxa kaga cad wax fikir ka duwa iasaga iyo awoowihiu ma jiro waxaan ku talinaya hala faklaro si xayndaabka aynu uga baxno

"Hadaan maskaxda laga shaqaysiin mankana loo gayn muruqna lagu darin mugdi lagama baxo"

KHATARTA WARARKA AMA WARGAYSYADA



Xalada aduunka hada lagu jiro maha mid in la qariyo u bahan hadana maha mid la qariyo waxa wanaagsan ,waxa jira hadaad u fiirsato wargaysayada caalamka inay raadiyaan inta xun ama inta khatarta leh,hadan waxaa yar inaad inta badan aad arki waydo waxyabaha nafta dhiirgalinaya sida horomarka.

Warbaahintu waxay noqotay hub aan horay loo arag taariikhda dadka waa sadaaliyana ay la yabeen oo aan la filayn in aduunka inta hub laga tago la isku adeegsado warbaahinta kadib dalka lagu burburin karo

QORRAXDII DHACDAY 2018

Hadaan fiirino waxaa jira dalado badano o aduunka oo dhisnaan jiray maanta ma dhisna ,lama burburin oo hub looma adeegsan warbaahin baa kala dirtay dalalkaa.

Waxa jira dawaldo badan oo iyana lagu dhisay warbahinta ,waxaa iyana jira dawladu ay xadidan tahay warbaahintu baqdin laga qabo in in ay fududayso burburinta wadankaas

Aduunka maanta awoodu waxay u janjeerta ama u foorarta warbaahinta ,hadynu fiirino tariikhda waxa jiraa dalal badano o hub loo adeegsaday oo ay ka dheceen khasaar naf iyo maal laakin waxaad mooda dagaalka warbaahintu inuu khasaaro yaryahay .

Warbaahintu waa hub culis ,dalal lagu burburinkaro,dalalna lagu soo sari karo ,shakhsiyaadna lagu hubeenkaro,shakhsiyaadna hubka lagaga dhigi karo

QORRAXDII DHACDAY 2018

KADAA HA TUURINE !!!!!



Wakhtiga doorashada waxa inta badan caan ah oo la arka siyaasiyiin badano oo han qaltaaga hogaanka dalka hadana way yaryihiin inta danta guud wada ,way yaryihiin inta daacada,way yaryihiin inta horomarka wada.

Waxa jira inuu siyaasigu maanta doonayo inuu shacab helo si uu helo hogaanka dalka,marka waxa uu ku khasban yahay inuu shacabka dushasaaro si uu u helo hogaanka.

QORRAXDII DHACDAY 2018

Waxay dadku is waydiiyaaan siyaasiga maxaa marka hore kasi ah ,ha is waydiin maha mid adi dusha ku Saaray ee dantiisu dusha saaray
Nin siyaasi ah oo waligii tartamayay baa la waydiiyay war maxa laguu dooran wayay “war mar horaa la i dooran lahaa ee kuwa ila tartamaya ayaa xoog wayn oo dhammaan shacabka qaada anigu waan isku dayaya mise ma dhaafi karo xoogaa aan saa u buurneen”

markii ay doorashadu dhammaato waa la tuuraya shacabka waayo maanta looma bahna oo waxa uu helay waxii kala waynaa shacabka
waxaan rabnaa siyaasi aan na tuureen waxaan doonaynaa siyaasi dantayada og waxaan doonaynaa siyaasi madax banaan waxaan doonaynaa sharaf iyo karaamo .

ha ku fakarin siyaasi haddii aad na tuurayso ee ku fakar waxyabo kala waxaan u bahanahay siyaaasi markaanu doorano ilaa inta uu ka dagayo dusha nagu sida.

XAQA BEELAHA KA MAQAN WAA MAXAY?



Soomaaliya waa dal 25sano in ka badan burbur iyo dawlad la'aan aha sidaas iyado jirto hadana muddo.

Ada intaa la'eg waxay kuwada nolayeen hab dhaqan ah oo ah in reer walba uu ilaashado xasiloonidisa.
Soomaaliya wa dalka an kaso jeedo aniga ahaan waxaana kuso koray dawlad la'aan

iyado sida tahay waxan kusoo koray Amni iyo Xasilooni marmara ba dhici jirtay inay colaadi dhacdo intaan uso taagna waba yaryiihin.


Qabiil ama qabyaalad waa mida dhagahayga kusoo dhacda marwalba,hadana mudada aan jiray waxan maqlayay reer hebel iyo reer hebel waa is hayaan,qabiil hebel nin ba laga dilay,qabiil hebel waa argoosanaya,qabiil hebel iyo qabiil hebel haday hishiiyeen.

Hadan dadkii dawladii bay fahmeen oo waxay is dhaheen bal qabiil ka taga oo dawlada ada laakin sida ay doonayeen ma noqon, oo dawladi ba qabiil noqotaay, hadana dawladi marki ay qabiil noqotay, ba la yiri qabiilkasta bal dawlad ha noqdo, marka way adkaatay inay wada noqdan qabiiladu dawlad,hadana waxa la yiri bal qabiilo isku taga oo dawlad noqda,markana waxa dhacday waxay ka cararayeen wax ka

badan oo ah DULMI,in qabiiladi la yiri is raaca ay is dulmiyaan oo midba midka kale hoos dhigay,hadan waxa dhacday in la yiraahdo war qabiilka la liido lacag ba lasiinaya oo la dhahaya qaado,hadana way qanceen qabiiladi oo ilaa hogamiyihi qabiilka baba wuxuu doonayay helay hadana marki intaasi dhacday ba dawladi dhexe la isugu tagay oo la yiri bal wax inoo dhaxeeya aynu raadino waa la helay oo waa laguwada qancay.

QORRAXDII DHACDAY 2018

HA IS ADKEEN DIB U BAX



Mararka qaar inaad dib isu saarto waa macquul adoo badbaadinaya dhibtu inay sii badato,laakin waxaa mooda in dadku kula yabayaan waxaad dib isugu saartay adoo awooda inaad safka ku sii jirtid

Tusaale ahaan “waxaa dhacay siyaasad arimo dibad oo waxa gubanaya dhammaan hareeraha wadanka aad ku nooshahay ,micnaha wadama kugu hareeraysan baa burburaya cida falkaa gaysanaysana waad garan ,ma waxaad si

wadaysaa is adkeynta mise waxaad galaysaa qorshadaan kula hishiin laheed dawlada wax burburinaya”
Waad garan meeshaad ku biirayso
Sikale aah u dhigo
“adiga iyo saxiibada baa safar wada galaya waxaa dhacday habeenkii idinkoo hurda baa dab mid idin kamida maradiisa qabsaday kii kale buu hadana qabsaday adi waad aragta haddii aad ka kici waydo waad guban dhammaana way guban waa inaad kacda oo damisa “

Hadaba khatarta aduunka way badantahay, waxaan jira khataro wadajira oo loobahanyahay in masiirka ummada iyo degaanka la wada ilaaliyo

Ka fakar wax walba oo kuso food saara waa mida ad ku bad badin kartid ummado badan
Hadaan ku si cadeeyo hadalka khatar walba sabab bay leedahay sabataasi waa mida keentay khatarta ogow sababta mar hadaad badbaadiso dhammaan wixii ka danbeeya .

QORRAXDII DHACDAY 2018





QORRAXDII DHACDAY 2018



